
# WADDADII MA HAYNAA MISE WAAN KA HABOWNAY?

## GEEDI SOCODKA NABADDA SOOMAALIYA




QORE: DR. DAAHIR XASAN GUUTAALE

# *Waddaddii Ma Haynaa Mise Waa Ka Habownay 2012*

# Tusmada

**Maxay Dawladaha Soomaaliya loo dhiso u Guuleysan la' yihiin**
**In Koox la Door Bido lana diido in la Dhegeysto kuwa kale.**
**Shirkii Carta,**
**Shirkii Embagathy 2004**
**Shirkii Dib u Heshiisiinta Jabuuti.**
**Maamul Xumada Shirarka loo qabto Dadka Soomaaliyeed,-**
**Ololaha Hadda Socda:--**
**Ilaalinta hay'adaha Dastuuriga ah ee Qaranka**
**Magacaabidda Wakiilka cusub ee xoghayaha Guud**
**Kampala Accord Heshiis MIse Mu'aamarad,**
**Sidee ku yimid Kampala Accord**
**Qaabkii loo Ansixiyey Kampala Accord.**
**Kampala Accord wuxuu leeyahay Cillada badan oo Sharcinnimadiisa iyo dhaqan galkiisaba shaki gelinaya kuwaas oo ay ka mid yihiin:**
**Muxuu keenay Kampala Accord.**
**Arrimaha aan kor ku soo sheegnay waxay keeneen:**
**Dawlad Xumada uu keenay Kampala Accord:**
**Road Map-ku Muxuu Yahay?**
**Amisom ma laga sugi karaa in ay Dalka Amni ku soo celiso?**
**Tababbarka iyo Qalabaynta Ciidanka Soomaaliyeed**
**Midawga Al Qaacidda iyo Alshabaab--**
**Cunaqabataynta Hubka--**
**Caalamka oo fududaystay soo celinta Amniga**
**Amniga Gudaha**
**Dastuurka-**
**Wax ka Beddelka Axdiga Iyo Sharciyaynta Guddiyada iyo Shirweynaha**
**Xukuumadda oo aad Mooddo iney Go'aansatay iney Sharciga Garab marto,**
**Soo Xulidda Ergooyinka Shirweynaha Ansixinta Dastuurka,**
**Federaalka:--**

**Dawladaha Deriska ah Dani ma ugu jirtaa Soomaaliya Gobollo ah**
**Dib u heshiisiinta-**
**Dawlad Wanaagga iyo Maamulka Maaliyadda-**
**Waxyaabaha Road-Map-ka lagu sheegay waxa ugu muhiimsan in:**
**Hagaajinta Habsami u socodka Shaqada Qaranka**
**Fulinta Sharciga iyo Garsoorka**
**Xoojinta Hayada Lafdhabarka u ah Hagaajinta Maamulka iyo Dhaqaalaha.**
**Gurmadka Barakacayaasha**
***Mabaadii'da Garoowe***
**Natiijada laga filan karo Road-Mapka**
**Faragelinta Arrimaha Barlamaanka**
***Danaynta Dawladaha waaweyn ee arrimaha Soomaaliya***
***Dawladda Brittan:***
***Dawladda Turkiga***
***Dalalka Ciidammada u soo diray Soomaaliya***
***Shirkii lagu qabtay* Ingiriiska  *(23/02/2012)***
***Wax ka qabashada Burcad Badeednimada***
***Maxaa loogu Guulaysan waayey wax ka qabashada Burcad Badeedda ?***
***Sidee wax looga qaban karaa  Burcad Badeednimada***
***Shirka lagu Qabanayo Magaalada Istabuul***
**Badbaadinta Dhallinyarada :**
***Shirka lagu Qabanayo Magaalada Istanbuul***
***Xalka Arrinta Alshabaab oo sii fogaaneysa***
***Wada hadalka Soomaaliya iyo Soomaaliland***
***Dhismaha Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed,.***
**Gargaarka Aadaminnimo**
**Sannadkii Khilaafka iyo  Sharci Darrada**
**Samaynta Road Mapka iyo Shirarka**
**Ku Xadgudubka Axdiga ku Meelgaarka ah**
**Soo Gelidda Ciidammada Deriska ah**
**Kala Jabka Baarlamaanka**
**Heshiiska Kireynta iyo ilaalinta Badda**
**Talooyinka**

## HORDHAC

Qoraalkan wuxuu ku saabsan yahay sababaha keenay in lagu guulaysan waayo shirarka loo qabto Soomaaliya iyo Dawladaha laga soo dhiso shirarkaas. Wuxuu wax ka taabanayaa sababaha saldhigga u ah guul darradaas waxaana ka mid ah:

1.Dalalka deriska ah oo cuqdad ka qaba inuu soo laabto Qaran Soomaaliyeed oo soo noolayn kara fikraddii Soomaali weyn, waxayna jecel yihiin in Soomaaliya loo qaybiyo Gobollo yaryar oo Federaal ah. Qaybaha Soomaaliya ee hadda lagu tilmaamo iney nabad haystaan waa kuwa aqbalay iney dalka ka go'aan ama ay federal noqdaan.

2.Iyadoo marka Soomaaliya arrimaheeda wax laga qabanayo koox Soomaalida ka mid ah laga door bido kuwa kale, iyadoo loo arko in kooxdaas shaqada la doonayo in la qabto ay u fulinayaan sida loo rabo.

3.Qoraalku wuxuu xoogga saarayaa shirka hadda ay qabanqaabadiisu socoto oo la doonayo in soomaalida loo qabto. Wuxuu ifinayaa khaladaadka ku jira geeddi socodka la qorsheeyey iyo waxyaabaha saldhigga u ah oo ay ka mid yihiin:Kampala Accord, Road-Mapka iyo Mabaadii'da Garoowe. Kuwaas oo haddii ay sida loo qorsheeyey u fulaan aan xal u noqon doonin mushkidda Soomaaliya.

4.Qoraalku wuxuu farta ku fiiqayaa in saldhigga asaasiga ah mushkilada dalkani ay tahay dawladnima xumada iyo sharci darrada soo jireenka ah, taasoo aan dalkan u suurtagelineyn inuu ka faa'iideysto wax kasta oo la siiyo ha ahaato Deeq Samafal, mid Ciidan amase mid Dhaqaale iwm.

5.Ugu dambayn qoraalku wuxuu ku soo gabagaboobayaa baahida loo qabo in shirarka loo qabanayo Soomaalida ay dib u sixid ku sameeyaan qorshayaasha aan wax ka soo bixin ee soomalida markasta lagu mashquuliyo, loona jaheeyo waddo guul leh.Sidoo kale qoraalku wuxuu soo jeedinayaa talooyinka lays leeyahay waxtar bay u noqon karaan geeddi socodka lagu doonayo in dalka looga bixiyo dhibaatada.

# *Waddaddii Ma Haynaa Mise Waa Ka Habownay 2012*

*Markii muddo la joogaba Soomaalida waxaa loo soo hindisaa,Mashruuc loogu ekaysiiyo inuu dhibaatadooda xal u noqonayo. Waxaa loo soo qorsheeyaa geeddi socodka iyo Maraaxisha u mari doono. Waxaa la bilaabaa shirarkii iyo magacaabidda guddiyadii ka hawlgeli lahaa.*

*Soomaalidu isma weydiiso ujeeddooyinka shirarkaas iyo natiijada laga heli karo. Waxaa lagu yaacaa sidii meeshaas looga qayb geli lahaa oo dadku waxa ay qabaan loola qabi lahaa. Ma jirto cid ka fekerta danta Qaranka Soomaaliyeed, waxa meesha loo tagaa waa dano Beeleed,Gobol iyo inta badan dano gaar ahaaneed. Waxaana laga yaabaa iney tahay arrintaas sababta aan wax daraasad ah oo shirarkaas ka horreeya loo samayn.*

*Hadda waxaa la sameeyey hindisayaashii Soomaalida lagu hawl gelin lahaa, iyadoo la dhigay dhammaan qorshayaashii lagu hirgelin lahaa. Halkudhegga hawlgalka sannadkan waa waxa laga baxayaa ku meel gaarka, iyadoo loo marayo Dastuur cusub, dalka oo nidaam Federaal ah laga hirgeliyo iyo Baarlamaan cusub oo la magacaabo.Ma xallinayaa qorshahaanu dhibaatada dalka ka taagan, mase waa bukaankii oo la daaweynayo iyadoo aan baaris lagu samayn. Haddii aan xaqiijinno arrimaha aan kor ku soo sheegnay oo daawo ahaan soomaalida loogu qoray, ma xallismi doonaan mushkiladaha dalkan haysataa.Dadka soomaaliyeed ma ku qanacsan yihiin waxse ma laga weydiiyey.Maxaa loo diiddan yahay in arrinta si fiican loo daraaseeyo oo laga wada qayb galo yaase in la dedejiyo faa'iido ku qaba.Dadka qaarkood oo*

*isu muujinaya iney iyaga keligood yihiin kuwa waddanka isbeddel ka keeni kara sax ma yihiin ?.Dadka Soomaaliyeed wareer waa ugu filan tahay dhawr iyo toban sano in hadba loo jeexo waddo horay ka go'ane, halays weydiiyo meesha loo socdo iyo in waddo sax ah lahayo iyo in kale.Waa in la dejiyo qorshayaal Tifaftiran oo lagu gaaro ujeeddooyinka la dhigtay. Waa in aad loo qeexo qorshayaasha Road-Map-ka lagu xusay oo afarta qaybood ah. Mid kastaaba wuxuu u baahan yahay in gaarkiisa loo faahfaahiyo oo la waqtiyeeyo oo loo helo imkaaniyaadkii uu ku hirgeli lahaa iyadoo la sii saadaalinayo waqtiga la soo gabagabeyn karo.Waa in laga fekero qaab dawladeed karti iyo hufnaan leh,oo lagu laray qaab sharci oo Caddaalad iyo Garsoor leh sidii dalka loogu samayn lahaa.Waa inla helo qaab dalka looga nadiifiyo Argagixisada iyo Burcad Badeedda, bulshada degaannada loogu fidiyo adeegyo ,Amni, Shaqo iyo Dakhli leh.*

*Dadka Soomaaliyeed maanta waa tabar daran yihiin,talo xun yihiin waana kala qaybsan yihiin waxay caalamka uga baahan yihiin,in loo naxariisto,oo wax lala qabto.Dawladaha waa weyn iyo ururrada caalamiga ee ay Qarammada Midoobey ugu horreyso waxaa xil ka saaran yahay iney ka ilaaliyaan wax kasta oo looga faa'iideysan karo, ama wax u dhibi kara-*

## Maxay Dawladaha Soomaaliya loo dhiso u Guuleysan la' yihiin

Taariikhda waxaa jaamacadaha loogu dhigaa in laga faa,iideysto oo aan dib loo gelin khaladaad hore loo galay, waxaadse mooddaa in aan soomaalidu arrintaas ka faa,iideysan oo ay mar kasta ku soo celinayaan gafkii ay mar hore ku soo jabeen. Malaha waxaysan ka faa'iideysan Mu'umin laba goor God lagama Qaniino, amase waxaa ka xoog badan dabeecadda aan Tanasulka lahayn oo ah in la guuleysto xataa haddaan dantaadu ku jirin. Waxaa kale oo

meesha aan ka maqnayn iney jiri karaan dabeecado waayahan dambe soo kordhay oo ah haddii aan jago helo ama maslaxad kale wax kale oo aan dan ka leeyahay ma jirto ee sidii la doono hala ii isticmaalo wixii la rabana hala iga fushado dal iyo dad midna dan kama lihiye

**<u>In Koox la Door Bido lana diido in la Dhegeysto kuwa kale.</u>**

Marka la eego taariikhda dhow ee ku saabsan dadaalka loogu jiro dibu soo celinta Qaranka soomaaliyeed, waxaa kuu muuqanaya halganka is muquuninta ku salaysan ee hadba kooxi majaraha u qabanayso iyadoo kaashanaysa Dowladaha iyo ururrada daneeya soomaaliya oo aan marna faraha kala bixin arrimaha dalkan. Taasi waxay keentaa in:

a- Kooxo badan oo aan arrimaha dalka looga maarmin dibedda la dhigo loona diido iney yimaadaan Majaalista lagu hayo arrimaha dalka, -

b-In dadka qaar loo maamulo si aan u qalmin oo lagu khasbo wax aan u qalmin,-

c- In koox aan wax qaban Karin ay iska dhigto in iyagu ay wax kasta ku filan yihiin.-

Hadba waxaa is abaabula koox taas oo bulshada caalamka ka dhaadhicisa sida ay doonayaan in arrinta wax looga qabto iyaguna ay ahaadaan kuwa keli ah oo lala tashado, amase arrinta waxaa soo alifa kooxo ka tirsan Bulshada Caalamka iyo Waddammada deriska kuwaas oo markaa u raadsada koox soomaaliyeed oo sida iyagu ay doonayaan mashruuca u fuliya beddelkeedana la siiyo mudnaan.--

Shir kasta waxaa ka soo baxa in la heshiiyey oo axdi cusubna la dhigtay’ Barlamaan cusub la xushay, xukuumad iyo madax cusubna la doortay. Waa Dimoqraadiyad nooc cusub ah.--

Dawlad kastaa meel cusub ayey ka bilowdaa iyadoo aan tii ka horreysey xataa xil wareejin ka qaadan sidaasina waa sida xukuumadaha soomaaliyeed Tobankii sano ee la soo dhaafay ay ku shaqaynayeen bulshada caalamkuna ay kula socotey. Xukuumadahaas been beentaa marka ay muddo joogaan oo dadka soomaaliyeed iyo shisheeyihii danaynayeyba ay dantoodii ka waayayaan ayaa koox kale is abaabushaa oo iyagoo kaashanaya bulshada caalamka talada dalka maroorsadaan. Wax dib u eegis ah laguma sameeyo axdigii la dhigtay iyo wixii lagu heshiiyey midna. Waxaa loo gudbaa shirweyne ,Axdi,dawlad iyo wax qaybsi cusub waa sidaa ha isaga daba wareegto. --

Haddaad dib u milicsato geeddi socodkii dibuheshiisiinta waxaad arkaysaa in mar kasta koox bulshada ka mid ah oo tixgelin mudnayd laga tashanayey ama aan la siineyneyn kaalintii ay mudnayd.--

**<u>Shirkii Carta,</u>**



Shirkii Carta waxaa laga tegey oo la diidey in tixgelin la siiyo kooxihii hubaysnaa waxaana xoogga la saaray bulshada Riyadka ah oo dhab ahaantii si fiican uga soo qayb galay. Xataa waxaa ka soo qaybgalay kooxo ka mid ahaa kuwii hubaysnaa, kuwa harayna haddii xoog la saari lahaa ma fogeyn oo waa la keeni kari lahaa. In kasta oo shirkaasi ahaa kii ugu wanaagsanaa shirarkii soomaliya loo qabtay dalkana aysan ka dhicin muddadii Dawladdii Carta dagaallo waawayni

haddana waxaa fashaliyey kooxihii hubaysnaa oo laga tegey iyo Dawlado deris ah oo dano ka lahaa dalkan, kuwaas oo markooda ka dhaadhiciyey dawladaha daneeya soomaaliya in shirweyne loo qabto iyadoo meel cusubna laga bilaabayo dibna aan loo eegin dowalddii dhisnayd iyo wixii hore loogu soo heshiiyey.--

## Shirkii Embagathi 2004

Soomaalidii waxay ku yaacday iyagoo Habaqle ah oo aan lays weydiin waxa loo socdo iyo waxaa laga damacsan yahay dalkooda. Waxaa laysku ciriiryey meel la seexdo iyo wixii la cuni lahaa, yaa ergo noqonaya iyo sidee wax loo qaybsadaa, yaa Barlamaanka gelaya iyo yaa xukuumadda ka mid noqonaya. Maamulkaas oo dhanna soomaalidu talaba kuma lahayn ee dadka waxaa wax u qaybinayey dad shisheeye ah oo soomaalidu gacanta u gashay.

Waxaa mudnaanta koowaad la siiyey kooxihii hubaysnaa ama qabqablayaashii dagaalka waxaa hoos loo dhigay mudnaantii ay lahaayeen kooxihii kale. Waxaa la sameeyey saxiixayaashii oo u badnaa qabqablayaashii dagaalka kuwaas oo loo bixiyey hoggaamiyeyaasha siyaasadda qof aysan qorinna aanu meesha waxba ka helayn.



Dadkii kale waxay dani ku khasabtay iney ama iska tagaan ama ay iyaga hoos galaan. Waxay qaateen Baarlamaankii xukuumaddii iyo Madaxdii Qaranka

oo dhan.Dadkii soomaaliyeed oo sida wax loo maamulay Qawadsan iyo iyagii oo kibirsan ayaa dalka iskula soo noqday. Koox ka mid ah oo Qandaraas dawlado shisheeye kasoo qaadatay ayaa Xamar dagaalkii Ashahaada la dirirka ka bilaabay.Dadweynihii soomaaliyeed oo ka xumaa sidii loo maamulay shirkii kenya ayaa kacdoon kala hortegey. Xukuummaddii Embaghti waxaa laga qabsaday dalka intiisi badnayd waxaana laysugu geeyey Baydhabo. Qaylo ayey afka ku salaaxday waxaa na qabsaday argagixiso, Afrika, Igad iyo Maraykanow noo soo gurmada. Waxaa la dalbaday ciidamma shisheeye oo noocyo kala duwan leh waxaa la keenay safka hore iyo safka dambe. Waxaa la burburiyey kacdoonkii shacbiga oo ay hoggaaminayeen Maxkamadihii islaamiga ahaa. Waxaa dhacay burbur iyo barakac aan hore loo arag. Itoobiya ayaa dalka oo dhan qabsatay, haddana kumay ladin waxaa laga hor keenay Muqaawamo shacbi ah oo dadka soomaaliyeed dalka iyo dibeddiisaba ay u dhammaayeen. Waxaa caddaatay in aan Itoobiya waxba ka qaban Karin. Waxaa yaraatay kalsoonidii lagu qabey Itoobiya iyo xukuumaddii TFG ee ay Itoobiya iyadu soo hindistey. Waxaa suurtoobi waayey in dalka la maamulo oo shacbiga lagu khasbo wixii kenya lagu soo dhoodhoobay. Waxaa la fekerey meel kale oo looga wareego si loo kala firdhiyo xoogga shacbiga oo aad isugu duubnaa loona helo maamul ugu yaraan aan khatar weyn ku ahayn Dawladaha Gobolka iyo danaha caalamka,.Waxaa la gartay in la helo qaab ciidanka itoobiya uu ku baxo si sharaf leh Iyadoo la dhowrayo danaha guud ee Caalamka iyo Dawladaha Gobolka. Waxaa la magacaabay wakiilka xoghayaha guud jamciyadda Qarammada Midoobey oo loo magacaabay Axmed Walad Cabdalla oo si dhow ula shaqayn jirey dawladaha Maraykanka, Ingiriiska iyo Faransiiska kuwaas oo gacan iyo garabba ku siiyey sidii loo furfuri lahaa arrinta soomaaliya meel laga galana loo heli lahaa. Waxaa lays weydiiyey xaggee wax laga billaabaa, waxay talo ku ururtay in wax laga beddelo Dawladda TFG. Si loo dalooliyo nidaamkii jirey ee TFG waxaa lays ku diray Madaxdii si qaarkood booska looga banneeyo loona keeno kuwa kale oo waqtiga la joogo adeegi kara.

Waxaa bilawday is qabqabsi iyo in lagu tartamo Barlamaanka iyo bulshada caalamka taageeradeeda. Waxaa looga yeeray Nairobi iyo Adis Ababa. Wax lagu kaltamaba waxaa la fooiciyey Cali Maxamed Geeddi Ra,iisul wasaarihii muddada dheer sida hagar la'aanta ah u soo shaqeeyey. Si meesha loo sifeeyo waxaa sii socdey qaskii iyo jahawareerkii maamulka ka dhex taagnaa ilaa odaygii Cabdullaahi Yuusuf asagana dabaysha la raaciyey iyadoo aan loo abaal gudin. Waa ninkii ciidammada shisheeyaha oo itoobiya hoggaamineyso dalka ku soo fasaxay. Waa ninkii baray siyaasiyiinta in ninkii kaa horyimaadaba lagu shaabbadeeyo waa argagixiso. Waxaa lagu tuuray Yaman asagoo qaxooti ah oo haddana jirran.

Walad Cabdalla ayaa shaqa billaabay wuxuu tegey Newyork,Paris iyo London wuxuu soo qaatay dardaaran xoog leh waa nin Afrikaan oo fursad helay hawlgabna ku dhow waa inuu S haqaystaa!. Wuxuu ku wareegey Nairobi,Baydhabo,Adis Ababa iyo Jabuuti. Wuxuu booqday Asmara iyo Qatar iyo dalal kale oo waddammada carabta ka



mid ah oo uu is lahaa waxay kugu caawin karaan inaad hesho meel aad arrinta ka gasho. Waxaa loo sheegay in meesha ugu fiican oo dadka soomaaliyeed laga geli karo ay tahay in loo sheego in dalka ciidammada itoobiya ay ka baxayaan haddii la heshiiyo?. Dad badan waxay la noqotay iney macquul tahay haddii ay si nabad ah ku baxayaan ineysan wax xikmad ahi ku jirin inaan waqtiga isku dheerayno. Walad Cabdalla wuxuu ku dhaqaaqay inuu fikraddaas dad u helo. Wuxuu dhowr jeer ku laabtay Asmara iyo Jabuuti si uu u helo taageero uu mar uun isugu keeno dad labada dhinac wax ka geli kara. ARS iskuma raacsana in wada hadal la galo inta ciidanka Itoobiya dalka

joogo, Dawladda Eretrea oo ay marti u yihiinna arrintaas maba oggola. Koox uu Shariif Xasan hoggaaminayo ayaa hoos loola hadlay si ay mar uun u gola keenaan madaxda Isbahaysiga. Waxaa la qaban qaabiyey shir dalka Suudaan dabadeedna iyadoo aan dib loogu noqon Asmara ayaa waxaa shir loo tegey Nairobi halkaas oo madaxdii isbahaysiga ARS ay ku oggolaadeen iney dibuheshiisiin galaan. Halkaas waxaa ka bilowday khilaafka ARS qaybta ugu weyn hase yeeshee dad badan oo ururka ka mid ah ayaa taageeray in si kasta oo ay suurtogal ku tahay in itoobiya dalka looga saaro la adeegsado. Waxaa lagu heshiiyey  in wada hadal la galo.

## Shirkii Dib u Heshiisiinta Jabuuti.



Waxaa bilawday shirkii dibuheshiisiinta jabuuti oo u dhexeeyey Isbahaysigii dib u Xoraynta iyo Dawladii TFG oo Baydhabo degganayd. Isbahaysigii dib u Xoraynta oo markii horaba aan aad isugu xirnayn ayaa khilaaf hor leh ka dhex bilowday. Koox ayaa diiddey gebi ahaanba in wax wadahadal ah la galo, kooxihii gudaha ka dagaalamayey ayaa ka shakiyey sida wax u socdaan, oo codsaday in arrinta  cagta loo dhigo oo laga tixgeliyo,Codsigaas lagama hoos qaadin. Hase yeeshee wada hadallo hoose oo aan la shaacin ayaa madaxdii sare ee Isbahaysigu waxaa u muuqday iney qaataan ballan qaadyadii qarsoodiga ahaa ee loo sameeyey iyagoo Iska dhega tiray dalabka iyo dareenka ay qabeen Muqaawamadii gudaha ee laf dhabarka u ahayd halganka dib u xoraynta. Kooxdii

Asmara  qayb ka mid ah oo aan taageero weyn ka haysan gudaha iyo dibedda midna iyo TFG oo Dalambaabi ah ayaa qoorta laysu geliyey, iyadoo aan haba yaraatee aan la dhegeysan kooxihii kacdoonka ka waday gudaha kuwaas oo aan ku qancin sida wax  loo maamulay farahana ka qaaday halgankii ay ku jireen, maaddaama aan iyaga wax tixgelin ah laga siin dib u heshiisiintii Jabuuti. Talo Maroorsigaas iyo tixgelin la'aantaas waxa ka faa'iideystey kooxihii markii horaba kasoo horjeedey  sida Al Shabaab iyo Xisbul islaam. Madaxda ARS waxay rajeynayeen haddii iyaga oo madax ah ay dalka ku soo laabtaan iney heli doonaan taageerada dadweynaha , taasina ma dhicin. Bulshada caalamkuna waxay rajeyneysey in haddii ARS ay ku soo biirto TFG ay keeni doonto nabad , isbeddel iyo horumar taasoo aan iyana dhicin. Waxaa dhacay kala shaki, danaysi iyo is aamin la'aan soo dhexgashay tiirarkii Muqaawamada taasoo meeshii loo wada guntan lahaa in dalka lagu soo celiyo nabad iyo horumar keentay niyad jab iyo kala furfuran. Arrintaa waxaa ka faa'iideystey kooxihii doonayey in Muqaawamada la Caalamiyeeyo waxaana ka dhashay dagaal ka dhibaato iyo khasaara badan kii la daminayey iyo dabka hadda laga wada dareensan yahay Gobolka Geeska Afrika lagana baqayo inuu wada gaaro caalamka oo dhan. Arrimaha aan kor ku soo sheegnay iyo guul darrooyinka mar walba soo foodsaaraya dadaalka  loogu jiro dib u soo celinta iyo  dib u heshiisiinta Qaranka soomaaliyeed waxaa saldhig u ah:--

**Maamul Xumada Shirarka loo qabto Dadka Soomaaliyeed,-**

- is Muquuninta Soomalida dhexdooda ah

- u Adeegidda danaha Shisheeyaha

- iyo iyadoo aan si cilmi ah arrinta loo dersin  ee sidan bal halagu dayo ay ku socoto.

## Ololaha Hadda Socda:--

Sidu waa sideediiye hadda waxaa is abaabuley kooxo uu majaraha u hayo Maamul Goboleedka Puntland, kuwaas oo dawladaha iyo ururrada daneeya soomaaliya ka dhaadhiciyey qaabka ay tahay in loo wajaho arrimaha soomaaliya sannadaha soo aaddan. Geeddi socodkanina wuxuu ku salaysan yahay waxa loogu yeero Kampala Accord, Road-Map iyo Garowe Principles kuwaas oo dad badani ay ka soo horjeedaan, laakiin laga yaabo in qasab lagu jiirsiiyo siday caadadu ahaan jirtey. Hase ahaatee dhawr sano kadib ayey iyana fursad u heli doonaan iney Bulshada Caalamku u adeegsato wareerinta dadka dhibaatadu daashatey ee soomaaliyeed.

## Ilaalinta Hay’adaha Dastuuriga ah ee Qaranka

Walad Cabdalla wuxuu xoogga saaray in dubuheshiisiin laga dhex sameeyo dawladdii TFG iyo ururkii ARS iyadoo aan wax weyn laga beddelin hay’adihii qaranka(TFI,s).Waxaa la dhawray Axdigii ku meelgaarka ahaa baarlamaankii iyo hay’adihii kale ee u dhisnaa TFGda, hase yeeshee waxa lagu heshiiyey in tirada baarlamaanka la labalaabo madaxda qarankana la wada doorto oo sidaas lagu dhiso dawlad midnimo qaran.

## Magacaabidda Wakiilka cusub ee oghayaha Guud

Walad Cabdalla waxaa lagu beddeley oo jagadii wakiilka xoghayaha Guud ee Qarammada midoobey la wareegey Dr.Agostino Mahiga.

Dr.Mahiiga wuxuu arrinta Soomaaliya u wajahay qaab ka duwan qaabkii uu u wadey wakiilkii ka horreeyey kaas oo in badan la tashan jirey kooxo badan oo ka mid ah dadka




soomaaliyeed dhaqankiisuna uu uga dhowaa kan soomaalida aad mooddeyna inuu ka fahami ogaa.

Walad Cabdalle waxaad mooddaa inuu xoogga saarayey inuu Soomaalida isku soo ururiyo oo intii awooddiisa ah uu meel isugu keeno si ay wax u wada samaystaan.

Wuxuu xoogga saari jirey in la ilaaliyo hay'adaha dastuuriga si aysan u lumin sharciyadda qaranku, asagoo ku dadaalay in la doono koox kasta oo mucaarad ah oo debedda ka joogta dawladda si ay ugu soo biirto, arrintaana ilaa xad wuu ku guuleystey.Lama maqlin intii uu walad Cabdalle wakiilka ka ahaa dalka cid wax ka sheeganeysa oo ay is qabteen.

Dr.Mahiiga wuxuu bilaabay inuu samaysto barnaamij uu isagu si toos ah ugu maamulo dalka. Wuxuu samaystay koox Soomaali iyo ururrada gobolka ah oo arrinta kala shaqaysa . Wuxuu ku guuleystey in aan lagu dhaqmin oo meel layska dhigo axdigii ku meel gaarka ahaa iyo shuruucdii kale ee qaranka waddankana lagu maamulo hadba wixii ay soo hindisaan isaga iyo kooxdiisu.

Waxay u dhigantaa iyadoo waddanka inqilaab laga sameeyey, kaas oo ay hoggaamineyso qarammada midoobey, waa wax aan hore uga dhicin caalamka, waddan shuruucdiisa ay qarammada midoobey ku xad gudubtey.

Arrintani waxay u sahashey in isaga iyo kooxdiisu dejiyaan barnaamijyo saameyn weyn ku yeelanaya masiirka qarankan oo aan lagala tashan dadka Soomaaliyeed intooda badan,hase yeeshee ay qorsheeyeen in dadka khasab lagu jiirsiiyo.

Waxaa aad loo kala furfuray oo khilaaf ballaran la dhexdhigay kooxihii markii hore laysu soo ururiyey oo dibuheshiisiinta loo sameeyey.

Waxaa khilaaf la dhexgeliyey barlamaanka khilaafkaas oo uu qayb ka yahay wakiilka xoghayaha guud iyo barnaamijyadiisu maxaa yeelay khilaafka barlamaanka wuxuu ka dhashay diidmada la diidey in roadmapka la geeyo baarlamaanka iyo ku xadgudubka axdiga qaranka .

Sidoo kale arrimaha ka dhashay barnaamijyada aan kor ku soo sheegnay waxay keeneen in qabaa’il badani ay ku dhawaaqaan iney kalsoonidoodi kala noqdeen dawladda maaddaama ay ku xadgudubtey axdiga qaranka.

Dr.Mahiga waa nin la murma kooxo badan oo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed, oo mar kasta khilaaf abuura.Murannada Soomaalida dhexdooda ah ee uu ku lug yeeshay waxaa ka mid :

a-Khilaafka Barlamaanka

Wuxuu si cad ula safantay  Guddoomiye Shariif Xasan isagoo kor iyo hoosba u sheega inuu taagersan yahay.

Mar uu kula hadlayey magaalada Limuru ee dalka Kenya guddiga rifoomka barlamaanka wuxuu u sheegay inuu Shariif




Xasan yahay nin hiba leh iyo awood aan caadi ahayn(gifted and talented) uuna kala tashado arrimaha Soomaaliya,mar kastana uu siiyo tala wanaagsan oo uu ku farxo.

Sida uu u hadlo waxaad mooddaa inuu u yahay qareen isagoo hoosta ka xarriiqay iney khalad ahayd qaabka loo maray xilka qaadidda shariif Xasan dabadeedna xukumay iney khalad ahayd xilka qaadiddaasi.Sidoo kale wuxuu ku tilmaamay aqlabiyadda barlamaanka iney qaswadayaal yihiin maaddaama fikraddiisa aysan waafaqsanayn.

b-Madaxtooyada

Wuxuu sheegay in madaxtooyadii dalka ay la wareegeen koox diineed xag jir ah oo lagu magacaabo Aala Sheekh kuwaas oo aan dhaamin Al shabaab.

Arrintani waxay ka caraysiisey Culumaa'uddiin badan oo aad uga cabtay warka ka soo yeeray wakiilka xoghayaha Guud ee Qarammada midoobey, waxaa xataa ka hadlay madaxweynaha jamhuuriyadda oo yiri haddii ay dhab tahay in hadalkaas uu Dr.Mahiga yiri , marada ayaa ka dhacday.Hase yeeshee Dr.Mahiga waa ku adkaystay inuu warkaas ku saxsanaa meeshii uu cudurdaar ka bixin lahaa.

c-Madasha Daljir

Wakiilka xoghayaha guud wuxuu si gaar ah uga hadlay madasha dal jir oo ay samaysteen dad Soomaaliyeed oo ka kala socda qaybo badan oo bulshada Soomaaliyeed ka mid ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin xildhibaanno,dad qurbajoog ah ,ganacsato,macallimiin jaamacadaha iyo dugsiyasa sare iwm.Lama garanayo waxa uu u bartilmaameedsaday koox siyaasadeed oo gaar ah.

d-Ra'iisul wasaarihii hore M C Farmaajo

Dr.Mahiiga wuxuu sheegay in ra'iisul wasaarihii hore maxamed Cabdullaahi Farmaajo uu geed dheer iyo geed gaabanba u fuulay si uu ugu soo laabto saaxada Siyaasadda Soomaaliya,khilaafka barlamaankana uu ku lug leeyahay.

In kasta oo hore loola socdey in waqtigii uu farmaajo ra'iisul wasaaraha ka ahaa xukuumadda uu khilaaf dhexmaray Dr.Mahiga haddana lama filayn in khilaafkaasi gaarsiisan yahay in Dr.Mahiiga uu ku fekero inuu ka fogeyn karo Farmaajo siyaasadda Soomaaliya.

Haddaba waxaa is weydiin leh oo u baahan in la caddeeyo waxan uu samaynayo wakiilka xoghayaha guud ma waxay ka tarjumayaan siyaasadda rasmiga ah ee qarammada midoobey gaar ahaan xafiiska xoghayaha guud mise waa wax uu samaystay Dr.Mahiga.

Waxa u baahan in la qiimeeyo inta lagu guulaysan karo siyaasadda uu ka wado Dr.Mahiga Soomaaliya,xataa haddii bulshada caalamku ay ku taageerto.

## Kampala Accord Heshiis MIse Mu'aamarad,

Inta badan dadka soomaaliyeed waxay u arkaan in kampala accord uu yahay shirqool lagu waxyeelaynayo Qarannimadooda, looguna danaynayo shisheeye si loogu fuliyo dana qarsoon, wax maslaxad ahna aaney ugu jirin ummadda Soomaaliyeed

## Sidee ku yimid Kampala Accord

Bartamihii sannadkii 2011 ka markii uu soo dhowaadey waqtigii loo qabtay dawladda ku meel gaar ah , shirkii lagu qabtay magaalada Madrid ee dalka Spain ayaa waxaa la faray xukuumaddu iney keento geeddi socodka ama Road-Map-ka amase waxyaabaha ay qabaneyso inta aan la gaarin dhammaadka waqtigeeda. Is



afgarawaagii Madaxweynaha iyo Xukuumaddii Cumar Cabdirashiid iyo magacaabiddii R/wasaarihii Maxamed Cabdullahi Farmaajo wuxuu keenay in waqti badani ku lumo , xukuumaddii cusbaydna waxaa u suuroobi waayey iney Road-Map la timaaddo looga baxo waqtiga ku meel gaarka ah. Digniino iyo codsiyo badan ka dib ayaa barlamaanka oo ka baqayey in go'aannadiisu ay sharci noqon waayayaan lixda bilood oo waqigiisa ugu dambaysa uu muddadii jiritaankiisa ku kordhistey saddex sano maaddaama aan doorasho la qaban Karin shirweynana aan lacag loo hayn, isla markaana wuxuu guddoomiyey in doorashooyinkii madaxweynaha, guddoomiyaha Barlamaanka iyo ku xigeennadiisa waqtigeedi la qabto. Arrinta doorashada waxaa taageeray dhammaan bulshada caalamka oo uu ugu horreeyo Golaha Ammaanka Qarammada Midoobey. Guddoomiyaha Barlamaanku arrinta doorashada wuu ku adkaa waana ku adkaystay aqlabiyadda Barlamaankuna waxay u arkayeen inuu ku saxsan yahay taageero badanna wuu ku helay. Madaxweynuhu wuxuu

jeclaystay inuu kordhintaas qaybtiisa ka helo, si uu ujeeddadaas u gaaraana wuxuu adeegsadey xukuumaddii cusbayd oo uu ku tilmaamay iney wax badan qabatay ayna mudan tahay in fursad ay kaga mira dhaliso hawlaheeda la siiyo. Arrinkaa waxaa hor istaagey Guddoomiyaha Barlamaanka Shariif Xasan oo ku adkaystay iney xaq tahay qofkii doorasho ku yimid in waqtigiisi uu doorasho galo hala diido ama hala doortee.



Madaxweynaha si uu mowqifkiisa u adkeeyo wuxuu soo celiyey go'aankii Barlamaanka kaasoo Guddoomiyaha Barlamaanku diidey inuu barlamaanka ku celiyo waxa kale oo Guddoomiyuhu diidey inuu Barlamaanka horgeeyo soo jeedimo dhawr ah oo xukuumaddu soo jeedisey. Waxa bilowday kala fogaasho iyo is eedayn aan waxba laysula harin. Xafiiska UNPOS ayaa soo dhexgalay oo isku deyey inuu xalliyo hase yeeshee isku daygaasi ma mira dhalin maaddaama xukuumadu u arkaysey xafiiskaas inuu dhinac yahay taas oo keentay xafiiskaasi shirkii uu ku qabtay magaalada Nairobi in Xukuumadda iyo Madaxweynuhuba diideen Guddoomiyaha Barlamaankuna ka qaybgalo. – Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Barlamaanka waxaa looga yeeray Magaalada Kampala ee dalka Uganda oo markaas ay ku shirayeen kooxda loo yaqaan ICG, haseyeeshee waxaa adkaaday in heshiis la dhexdhigo madaxdaas. Shirkii ICG markii uu dhammaaday ayaa arrinta waxaa la wareegey dawladaha Gobolka oo uu hormood ka yahay madaxweynaha Uganda YUWERI MUSEVENI oo ku adkaystay in heshiis la gaaro. Waxaa si degdeg ah loogu yeeray Raiisul Wasaarihii waqtigaas Maxamed Cabdulahi Farmaajo waxaana laga codsay inuu is casilo. Arrintaas waxay ku noqotay ummadda soomaaliyeed oo dhan meel kasta oo ay joogaanba wax aan la qaadan Karin waxaana magaalada Muqdisho ka qarxay

Mudaaharaad iyo kacdoon socdey dhawr maalmood kaas oo dadka reer Muqdisho kaga hor yimaadeen go'aankaas ah in Raiisul Wasaaruhu shaqada ka tago oo loo arkayey nin waddani ah oo shaqa fiican waddanka ka qabtay. Kacdoonkaas oo dad ku dhintay waxaa lagu damiyey awood ciidan iyo culays si gaar ah oo aan habboonayn dawladda Uganda u saartay Ra'iisul Wasaaraha taas oo bilow u ah faragelin qaawan oo toos ah oo lagu sameeyey arrimaha gudaha ee dalka soomaaliya iyadoo la isticmaalayo ciidanka shisheeye oo dalka ku sugan. Sida uu Raiisul Wasaaruhu sheegay waxaa lagula heshiiyey inuu asagu tanasulo hase yeeshee ay shaqadooda 6sii wadanayaan Kooxdii uu madaxda u ahaa kuwaas oo markii dambe shaqada laga wada eryey,taas oo mar kale la yaab ku noqotay ummadda beeniseyna doodii ahayd in Golahaasi ahaayeen dad wax qabtay ayna mudnaayeen in fursad la siiyo oo ahayd dulucdii keentay (Kampala Accord).Arrintani waxay marag u tahay in madaxda hoggtaanka u haysa dalka waxa ay sheegayaan iyo waxa ay samaynayaan kala duwan yihiin. Waxa kale oo la yaab leh in wax kasta oo ay sameeyaanba ay garab uga helayaan bulshada caalamka iyo dawladaha Gobolka.--

## **Qaabkii loo Ansixiyey Kampala Accord.**

Shariif Xasan oo soo ballan qaaday inuu heshiiska Barlamaanka mariyo runtiina aad xariif ugu ahaa sida Barlamaanka wax looga ansaxsado kuna lahaa xubno badan oo asaga rabitaankiisa ku shaqeeya . wuxuu ku guuleystey inuu helo tiro ku filan oo gacanta u taaga heshiiskaas.Haseyeeshee wuxuu ka weecday inuu marsiiyo habraacii loo baahnaa in ansixintu u dhacdo isagoo ku kaaftoomay in gacanta loo taago oo sidaa uu ku moodo.Hase yeeshee sida saxda ah marka sharci la ansixinayo, marka hore waxaa wax laga beddelaa qodobbada sharcigaas ka soo horjeeda ee ku jira axdiga ku meel gaarka ah. In axdiga qodob ka mid ah wax laga beddelo waxay u baahan tahay iney u codeeyaan saddex meelood oo laba xubnaha Barlamaanka,

waana midda laga yaabo inuu Shariif Xasan uga leexday inuu u maro habraac sax ah, isagoo ku qanacsanaa inuusan heli Karin tira uu wax uga beddeli karo.--

## **Kampala Accord wuxuu leeyahay Cillada badan :--**

Kampala Accord wuxuu leeyahay cillado badan oo sharcinnimadiisa iyo dhaqangalkiisa shaki gelinaya kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

a) Iyadoo ay qodobbada kampala Accord ay iska hor imanayaan,--
b) iyadoo aan wax isbeddel ah lagu samayn qodobbadii axdiga ee ka hor imanayey heshiiskaas,
c) iyadoo aan la marin habraacii uu sharci ku noqon lahaa.
d) iyo asagoo ka hor imanaya Mabaadii'da guud ee Dastuurka iyo xaqa Muwaadinka ee ku saabsan in lala xisaabtami karo madaxda.

Sidaa darted Kampala Accord ma oofsan shuruudihii uu ku noqon lahaa sharci mana hirgali karo.--

## **Muxuu keenay Kampala Accord.**

Kampala accord wuxuu keeney isbedel weyn ee ku yimid habdhaqankii Dawladeed ee dalka.--

A- Waxaa isku soo ururay shaqadii Hayadihii Dastuuriga ahaa ee loogu talagalay iney is miisaamaan ama is ilaaliyaan.
B- Hayadihii oo shaqsiyaad isu beddeley ama loo sahlay in si shakhsi loogu takri falo.
C- Sharcigii iyo Xukunkii sharciga oo meesha ka baxay.-

D- Ururrada Gobolka iyo kuwa caalamiga ah iyo dawladaha waaweyn oo aan daneyneyn ilaalinta shuruucda dalka.

## **Arrimaha aan kor ku soo sheegnay waxay keeneen:--**

1.Guddoomiyaha wuxuu urursaday kuna takri falay awooddii Baarlamaanka oo dhan asagoo samaystay:

a) Kooxo u gaar ah oo shirarka uga qayb gala oo uu si gaar ah u xannaaneeyo.--

b) Wuxuu iska xiray Barlamaankii si aan buuq iyo doodi uga imaan waxa uu samaynayo.-

c) Wuxuu noqday mid ah saxiixayaasha Road-Map-ka .

d) wuxuu wax ku yeeshay awooddii fulinta isagoo wax ka maamula shaqada xukuumadda.--

e) wuxuu gaar la noqday Maaliyaddii Barlamaanka oo uu sida uu doono u isticmaalo iyadoo aan cidina ka war hayn sida maamulka Barlamaanku u socdo.--

f) Waxaa meesha ka baxay awooddii shacbiga oo Barlamaanku wakiilka ka ahaa.--

2. Madaxweynuhu waa astaanta Qaranka, waa odayga dawladda iyo xiriiriyaha Hayadaha dawladda hase yeeshee ma laha awood weyn oo sharci oo asagu ku farageliyo Hayadaha kale ee dawladda hase ahaatee beryahan dambe wuxuu ku dhaqaaqay arrimo aan ku habboonayn xafiiskiisa sida:--

a) ku xadgudub Qodobbo ka mid ah Axdiga ku meel gaarka ah;--

b) Wuxuu soo farageliyey shaqada Barlamaanka isagoo ku tilmaamay inuu baadil yahay go’aankiisu.--

c) Wuxuu ka qayb qaatay in dalka la soo geliyo ciidammo shisheeye iyadoo aan sharci loo marin.--

3. Raiisul Wasaaruhu beryahan wuxuu wadaa hawlo badan oo aan sharciga waafaqsanayn, sida ciidamma shisheeye oo

dalka la soo geliyey iyadoo aan Barlamaanka la marin, kuwaas oo xasuuq u geystey dad rayid ah oo aan waxba galabsan. --

4- Wuxuu ka meermeeray inuu keeno Barlamaanka Road-Map-ka isla markaa isagoo ku hawlan fulintiisa kuna shaqeeya waxyaabihii ka dhashay;-

5- wuxuu magacaabay guddiyo aan sharci ahayn sida guddiga khubarada Dastuurka iyo guddiga Ansixinta Dastuurka arrintaas oo horay si sharci ah guddi loogu xilsaaray.-

**<u>Dawlad Xumada uu keenay Kampala Accord:--</u>**

- In dawladdii isu beddeshey`kooxo is barbaryaaca, iyadoo madaxda dawladda sida Madaxweynaha ,Afhayeenka Barlamaanka iyo Ra'iisul Wasaaruhu ay u muuqdaan kuwa aan is ma talin oo midba gaarkiisa u socda, taasoo meesha ka saaraysa ama is dhexgelineysa awoodihii sharciga ahaa iyo waajibaadkii uu masuul walba gaarkiisa ugu xilsaarnaa.-

- Inuusan jirin wax isla xisaabtan ah, waxaa lumay miisaankii iyo isla xisaabtankii Hayadaha dawladda ka dhexeeyey iyadoo xukuumaddu ka baxday kortoroolkii Barlamaanku ku kormeeri jirey ,waqtiga la joogana ma jirto cid xukuumadda xisaabin karta ama la xisaabtami karta.-

- In sharcigii la laabay, iyadoo ku dhaqanka qodobbo badan oo ku jira axdiga ku meel gaar ah ku dhaqankooda layska dhega tiray sida kuwa ku saabsan awoodda shacbiga oo Barlamaanku wakiilka ka yahay oo ay laga maarmaanta tahay arrimaha taabanaya masiirka dalka in Barlamaanka la mariyo. Waxaa si aan habboonayn loo maamulay qaabkii uu axdigu u dhigay samaynta Dastuurka Qaranka, Xasaanadda xildhibaannada iyo guud ahaan arrimaha sharci dejinta.-

- in dalkeenna la iska soo galo oo ayan jirin cid wax laga weydiiyo. Waxaa jira ciidamma shisheeye oo dalka soo galay,iyadoo aan Hayada Qaranka ee hawshaas leh si fiican uga wada tashan, sida ugu wanaagsan oo looga faa'iideysan karo, waqtiga ay ciidammadaasi dalka joogayaan iyo shaqada ay qabanayaan.--

- in dadkeenna xuquuqdooda maalin kasta lagu xad gudbo oo aan cidina u damqaneyn. Waxaa dhacaya xadgudubyo noocyo badan ha ahaadeen duqaynta Cirka, Madaafiicda iyo Rasaasta oo beryahan dambe dad badan oo shacab ah ay ku dhinteen ama dad badan oo Soomaali ah oo ku jira xabsiyo dalal kala duwan ha ahaadeen qaxootiga ku jira xeryaha, Dhallinyaro tahriib ah ama kuwa loo qabtay Burcad Badeednimo. Si kastaba ha ahaatee dadka Soomaaliyeed ma helaan xuquuqdooda aadaminnimo.-

- Siyaadadii dalkeena oo dowladdo iyo ururo shisheeye la wareegeen. Waxaa hubaal ah in si aan qarsoonayn arrimaha Soomaaliya ay gacanta ugula jiraan dawladaha deriska ah ururrada gobolka iyo bulshada caalamka.-

*Waa maxay sababta loo diidey in madaxda dowladda haddii ay u gafaan sharciga ama ay xilkooda gudan waayaan talaabo sharci ah laga qaado?--*

Muddo ka badan saddex sano ayaa Madaxdani soo Hogaaminayeen dalka, iyadoo aan wax Mooshin ah laga keenin,.Waxaa noqday wax la yaab leh in heshiiskii kambala lagu soo qorey in aan Mooshin ah laga keeni Karin.--

Arintaas waxa loola jeedey markii hore dad badani ma fahmin, sidaa darteed ayaan xildhibaano badani dareen weyn ka muujin, hase yeeshee sida ay u dhaqmeen madaxda sare ee dowladdu markaa ka dib, waxaa la dareemay inuu jirey qorshe

aan ummadda loo sheegin, oo madaxda laga rabey iney fuliyaan wax aan u cuntameyn una qalmin ummadda soomaaliyeed, lagana cabsanayey in Baarlamaanku uu hor istaago.--

Si loo fuliyo qorshayaashaas, waxaa la go;aamiyey in:--

a) la cuuryaamiyo awoodda Baalamaanku u leeyahay in uu joojiyo waxyaabaha la qorsheeyey,oo aan u cuntami Karin dalka iyo dadka.--
b) In Madaxda hawshaas qabanaysana laga ilaaliyo in tallaabo sharci ah laga qaado.--

Markaas ka dib waxaa isa soo tarey talaabooyinkii lagu hirgalinayey qorshayaashaas, kuwaas oo ay ka mid yihiin:--

1- In shaqada Baarlamaanka la joojiyo iyadoon si rasmi ah loo shaacin,sida shirarkiisa,iyo Barnaamijyadii iyo sharciyadii ay dawladdu keeni lahayd in lala garab maro.--
2- In la sameeyo qorshayaal la xariira masiirka dalka iyadoo aan loo marin waddo sharci ah ama aan barlamaanka la marin, sida arrimaha hadda socda oo ay ka mid yihiin Road-Map-ka iyo shirweynaha la doonayo in la qabto , kuwaas oo ay ahayd in marka hore sharci lagu saleeyo. --
3- In la sameeyo Hayado iyo guddiyaal sharci darro ah oo meel mariya qorshayaashaas. Waxaa la sameeyey guddiyo aan la sharciyeyn sida guddiga khubarada dartuurka, oggolaanshaha dastuurka iyo shirweynaha.--
4- In la soo galiyo ciidammo shisheeye oo aan wax koontarool ah iyo waqti midna ku xadidneyn.--
5- In la difaaco madaxda la isticmaalayo. Waxaa aad la yaab u leh in Ha'yado iyo ururro badani iyo xataa dawlado , ay aad isugu mashquuliyeen difaaca shakhsiyaad meeshii ay xoojin lahaayeen nidaamka iyo sharciga.--

6- In la soo jeediyo in ku meelgaarka laga baxo si loo gaaro danno kale oo qarsoon. Waxaan soo aragnay sida kampala Accord uu khalkhalka u geliyey nidaamkii dawladda, sidaas darteed in ku meelgaarka laga baxo iyadoo dalku uusan haysan siyaado taam ah ama xornima buuxda waxaa laga cabsi qabaa in ay dhici karaan waxyaabo Qarannimada iyo danaha dalka waxyeeli kara.--
7- In la qabto shirweyne been abuur ah lana qorto xildhibaanno macmal ah oo lagu fushado waxa la doonayo. Waxay keeni kartaa inuu dalku ku sii jiro xaaladda dawladnimo xumo iyo faragelinta shisheeye oo uu hadda ku sugan yahay, iyadoo laga yaabo in loo sii cimri dheereyo kooxo aan waxba ka beddeli Karin xaaladda lagu jiro taas oo uu hubaal ka dhigayo ,qorshaha Road-Map ka sida uu hadda u dhigan yahay.

## **Road Map-ku Muxuu Yahay?--**

Road-Map-ku waa howlaha loogu talagalay in la qabto muddada u harsan Hay,adaha dowladda si looga gudbo ku meel gaarka.—
Hawlahaasi waxaa lagu soo koobey oo mudnaanta la siiyey, in wax laga qabto afar arimood oo waaweyn oo ah :--
A- Amaniga--
B- Dastuurka--
C- Dib u heshiinta--
D- Dowlad wanaagga--

Road Map-ka waxaa laga soo saarey shir lagu qabtey Magaalada Muqdisho 4-6dii September ee 2011. Shirkaas waxaa ka soo qayb galey wufuud ka kala socotey Dowladda KMG, Gal-Mudug, Sunna –waljamaca iyo Puntland.

Su,aasha ugu horraysa ee la is weydiinayaa waa shirka waxa ka soo baxay maxay yihiin ma talooyin bay noqonayaan mise sharci ay tahay in lagu dhaqmo oo la fuliyo?, ma waxaa laga ansixinayaa barlamaanka si uu sharci u noqdo mase ansixin uma baahna? .--

Dadka madaxda u ah kooxaha ka soo qayb galey shirkaas waxay isku magacaabeen saxiixayaal ama (steak holders) ,iyagoo la gaar noqday talada dalka , xaq ma u leeyihiin, yaase u wakiishay.?--



Su,aashu waxay tahay sharci ma u leeyihiin in ay kaligood ka taliyaan masiirka dalka , waxay soo saaraanse sharci ma noqonayaan?.--

Marka aad eegto sida loo dhigay (Road mapka) wuxuu ku tusayaa  inuu awood siinayo kooxaha isku magacaabay (steak holderska), hawlaha la qabanayo oo dhanna iyaga ayaa gacanta ku haya.--

Waxaa dibadda la dhigey dad badan oo wax ku kordhin kari lahaa talada dalka ama doonaya in ay ka qayb galaan oo danahooda ka difaacdaan,Madaxdaasi waxay samaysteen qaabkii ay ku koontarooli lahaayeen waxa ka soo baxaya shirarka la qabanayo, ayna ku xaqiijin lahaayeen waxa ay doonayaan iney ka soo baxaan, si taas loo gaarana waa in cidda iyagu ay doonaan oo keli ah ay shirarka timaado , si ay u gaaraan danahooda.--

Haddii sida loo qorsheeyey geeddi socodku u fulo waxaa xaqiiqa ah in aan Road-Mapkanu wax isbedel ah dalka u keeni doonin. --

Marka mid mid looga hadlo afarta hawlood oo mudnaanta la siiyey waxaa muuqata inaan la fili Karin wax macno leh oo yididiilo cusub ku soo kordhin kara dalka iney ka soo bixi karto.--

1- Amniga:--

Qorsha howleedka amniga kama muuqdo qorshe sugan oo si cad u qeexaya:--

A) sida nabad loogu soo celinayo dalka.--

B) Lama xadidin waqtiga ay ciidamada shisheeye ku soo afjarayaan shaqada , dalkana uga baxayaan .--

C) Qorshuhu ma sheegayo qaabka loo dhisayo ciidammada Qaranka, sida loo maal galinayo iyo waqtiga ay si buuxda ula wareegayaan amniga dalka.—

D) Waxyaabo badan oo qorshaha amniga lagu xusay waxaa muuqata in aan weli laysuba xilqaamin, waxyaabahaas oo ay ka mid yihiin:--

a) in caruurta laga ilaaliyo xadgububyada iyo in ciidamo loo qoro --

b) iyo in la dhowro shuruucda caalimiga ah ee bani,aadaminimada iyo xuquuqda aadanaha,Iska dhaaf in xuquuqdaas la ilaalshee waxaa beryahaan dambe aad u soo batay tacadiyada iyo xasuuqa loo geysanyo dadka rayidka ah oo ay ku jiraan caruur , haween iyo rayid tira badan kuwaas oo ku dhimanaya duqeymaha lagu geysanayo magaca dalka Keenya, oo la sheegayo in argagixiso lagu laynayo. Meelaha ciidammada keenya ay duqeeyeen oo lagu laayey dadka rayadka ah waxa ka mid ah: meelo badan oo ka mid ah gobolka gedo sida Baardheere iyo ceelcadde, Gobolka jubbada Hoose sida Husingo iyo Buulo Xaaji iwm, Gobolka Jubbada dhexe waxaa ka mid ah Magaalada Jilib oo dhawr jeer la duqeeyey dad maata ah oo carruur iyo qaxooti ahna lagu laayey arrintaas oo ay caddeeyeen Hayadaha samafalka oo ay ka mid tahay ICRC iyo dadka degaanka,.Xadgudubyada ciidammada Kenya ay geysteen waxa ka mid ah kuwo loo geystey dadka qaxootiga ah oo ku sugan xeryaha dalka Kenya ku yaal,xadgudubyaas oo ay caddaysay amnesty International.--

## **Amisom ma laga sugi karaa in ay Dalka Amni ku soo celiso?--**

Ciidanka Amisom oo dalka ku sugnaa muddo dheer oo ku dhow lix sano, shaqadoodu ma dhaafin magaalada Muqdisho



iyo ilaalinta xafiisyada dowladda qaarkood.--

Hadda ka hor uma suurta galin in ay magaalada Muqdisho wada hantaan iska dhaaf in ay wax ka qabtan Gobollada kale.--

Haddi ay lix sano ka badan ku qaadatay iney sugaan nabadgelyada Magaalada Muqdisho keli ah , lama garanayo inta uu ku qaadan doono dalka oo dhan amnigiisa in ay sugaan. Amisom uma tababarna shaqada ay hadda hayaan oo ah dagaalka Magalooyinka, waxayna shacabka u geysteen xasuuq iyo xadgudubyo badan , dad badan oo shacab ahna way laayeen hanti badanna way burburiyeen taasina maaha arrin marag u baahane waa mid iska cad oo la wada ogyahay, waxaana la xusi karaa Bakaaraha,Boondheere, kaxda iyo Masjidka Hidaaya oo ay Madaafiic ku garaaceen Culimmadii Tabliiqana ku laayeen.--

Ciidamada Amisom in kasta oo naftooda u hureen wax ka qabashada amniga dalka ayna ku mahansan yihiin iney u soo gurmadeen ummadda soomaaliyeed aduunkuna ku bixiyey Maaliyad iyo qalab badan oo milatari dalkan amnigiisa wax weyn kama bedelin. Mar kasta waa la soo kordhiyaa ayadoon xaaladda ciidammada soomaaliyeedna waxba iska beddelin. Amisom waxay ku guuleysatey in aan ciidammada

soomaliyeed la aaminin lana maalgalin ayadana ay tala saartaan madaxda dalka iyo dawladaha kaalmeeyaaba.--

## **Tababbarka iyo Qalabaynta Ciidanka Soomaaliyeed--**

Waxa keli ah oo wax ka beddeli kara xaaladda amniga dalka waa in la helo ciidan Soomaaliyeed oo u diyaarsan qabashada hawshaan culus, kuwaas oo haysta qalab iyo tababbar fiican, lana siiyo xannaano iyo Dishibiliin wanaagsan oo ay hawshooda ku gudan karaan.--



Muddadii ay jirtey dawladda Federaalka ku meel gaarka ah waxaa la soo tababbaray ciidammo badan oo soomali ah , tababbarkaas oo ay ka qayb qaateen dawlado badan oo ay ka mid yihiin kuwa Gobolka iyo Yurub, sidoo kale waxaa jirey taageero xagga ciidanka ah oo la siinayey dawladda. Si kastaba ha ku dhacdee wax weyn oo faa’iido ah lagama helin taageeradaas,iyadoo aan dalka loo soo saarin ciidan wax qaban kara.Sababaha laga yaabo iney hor joogsadeen in la helo ciidan Soomaaliyeed oo wax qaban kara waxa ka mid noqon kara:--

1.Iyadoo dawladaha deeqda bixiya ayan dhiirri gelin in la dhiso ciidan Soomaaliyeed beddelkeedana ay door bideen iney tageeraan ciidammada Amisom oo ay dhaqaale badan ku bixiyaan, taas oo aan la garaneyn inta ay taageeradaas sii wadi doonaan.-

2.Ciidammada Soomaaliyeed oo aan weli loo qaabayn qaab wanaagsan oo ciidan iyo masuuliyadihii ciidanka oo aan si fiican loo hawlgelin.--
3.Ciidanka oo aan helin mushaar joogto ah oo ku filan oo ay ku shaqayn karaan iyo daryeel caafimaad oo waxtar leh, inta badaanna dhaawacoodu uu dayac ku dhaco.--
4.Qalabka dagaal oo ay haystaan oo liita markastana hubka cadawgoodu haysto uu ka fiican yahay kana taya sarreeyo kan ay haystaan, isla markaana aysan helin logistikada iyo gurmadka ay u baahan yihiin waqtiga ku habboon. Inta badan marka askarigu uu soo dhammaysto tababbarka oo uu dalka ku soo laabto waxaa la siiyaa qori iyo lebbis uu ku dagaal galo, isagoo aan helin mushaar joogto ah , daryeel caafimaad, raashin ku filan iyo hub uu isku difaaco midna, taasina waxay askariga ku kalliftaa arrimaha  soosocda middood:--
a) Inuu inta qorigiisa gato shaqada ka dhuunto.--
b) Inuu cadawga u galo haddii uu ka baqo in tallaabo laga qaado ama la xiro.--
c) Inuu raadsado shaqa kale oo uu noloshiisa ku dabbaro hawsha ciidankana u googooyo oo marmar uun yimaado.--
d) Iyo inuu noqdo burcad dadka dhaca oo noloshiisa ku soo saarta qorigii iyo lebbiskii loo siiyey inuu dalka ku difaaco, taasina waa dayaca lagu hayo ciidanka soomaaliyeed.--

Lama garanayo waxa loo diidey in dalka ciidankiisa la qalabeeyo oo la maalgeliyo taasoo ay maaliyadda ku baxaysaa  aad uga yar tahey tan ku baxaysa ciidammada shisheeye dalkana uga mustaqbal fiican oo suurtagalin karta inuu amnigiisa hanto la dagaallanka argagaxisadana uga fiicnaan lahayd.--

waxaa intaa dheer in taladii dalka ay u sahlanaatey in shisheeyuhu siduu doono ka yeelo oo wax kasta oo madaxda laga rabo loogu caga jugleeyo haddii aadna saas yeelin

ciidankeenna waa la baxaynaa sidii lagu sameeyey Ra'iisul Wasaare Farmaajo.--

## <u>Midawga Al Qaacidda iyo Alshabaab--</u>

Sidaan anigu u arko Midowga labadan urur ma aha arrin fudud oo la yaraysan karo. Waa run iney labada urur lahaayeen calaaqaad muddo dheer soo jirey, waxa kale oo jira iney dhibaatooyin iyo khasaarooyin kaleba ay waayahan dambe soo gaareen,iyadoo la dilay dad madaxdooda ka mid ah. Mabda'a labada urur ay ku dhisan yihiin ma aha in waqtiga hadda la joogo in maamullo iyo dawlado ay ka taliyaan la dhiso, hase yeeshee waa in la burburiyo maamullada jira dadkana la baqdin geliyo oo la argagixiyo. Fursadda Alshabaab ay heshay ee ay ku qabsatay Gobollo badan oo ay maamul ka samaysatay muddana ku badbaadey waa fursad dheeraad ah oo aan caadi ahayn oo ay heshay, dhab ahaanna ay ka faa'iideysatey, taas oo ku timid tabar darrada iyo maamul xumada amniga dawladda ku meel gaarka ah.--



Ku biiritaanka Alshabaab ay Al Qaacidda ku biirtay waxay ka dhigan tahay Alshabaab oo qaan gaartey oo masuuliyaddeedi la sii ballaariyey oo meeshii ay Soomaaliya ka hawl geli jirtey hadda ka hawlgelaysa waddama badan, sidoo kale waxaa hadda wada hawl gelaya dagaalyahanno dalal badan ka kooban, si dagaalka looga shido dalal badan.

Dhowaan waxaa lagu qabtay dalalka deriska dagaalyahanno dhalashadoodu kala duwan tahay oo watay baasaboorrada

dalalka reergalbeedka ah kuwaas oo u socdey iney ku biiraan Alqaaciddada Geeska Afrika.Dagaalyahannadaasi oo ay ka mid ahaayeen dad asal ahaan kasoo jeeda Bakistaan,Poland, Bangaladesh, Afrikaan iyo Carab waxay intooda badan wateen dhalashada dalalka Ingiriiska iyo Faransiiska.

## Cunaqabataynta Hubka--

Guuldarrada haysata ciidanka dalka waxay inta badan ka timaaddaa taya xumada qalabka ay haystaan , yaraanta saadka,iyo mushaar la'aanta haysata. Kooxaha mucaaradka ah ee dawladda ka soo horjeedaa waxay hubka ka helaan Suuqa Madaw , kaas oo ayan marna saamayn cunaqabataynta Qarammada Midoobey ay dalka ku soo rogtey. Qof kasta oo Suuqa Madaw ee Soomaaliya Hub ka raadsada si fudud ayuu ku heli karaa inta uu doonana wuu heli karaa.--

Cunaqabataynta Qarammada midoobey ay Soomaaliya ku soo rogtey waxay saamayn weyn ku yeelatay ciidanka qaranka maxaa yeelay dawladdu waxay hubka ka heshaa ilo rasmi ah (Official Sources) oo keli ah, taasina waa sabab ka mid ah sababaha uu u dhismi la'yahay Ciidan Soomaaliyeed oo waxtar leh.--

## Caalamka oo fududaystay soo celinta Amniga--

Waxaad mooddaa sida caalamku u wajahayo arrimaha Soomaaliya inaan la siin mudnaanta ay leedahay. Mushkiladdani ma aha mid Soomaaliya ku ekaanaysa . Waa arrin mabda' ku salaysan oo si fudud loogu faafin karo adduunka oo dhan oo aaney jirin meel ka badbaadaysa. Ciidammada hadda Al Shabaab u dagaallama waxaa la sheegaa iney ka kooban yihiin waddama badan, oo ay ka mid yihiin Carab, Afrikaan, Yurub, Maraykan iyo Aasiya, kuwaas

oo ugu dambayn fikirkaas kula noqon doona dalalkii ay ka yimaadeen. Kuwa dalal badan oo Afrikaan ah ka socdana waxay siiyaan tababbarro, ay uga hawl galaan waddammadoodi. Waxaa lagu qiyaasaa ciidammada Shabaabka in badan oo ka mid ah iney ka yimaadeen dalalka deriska ah sida Kenya, Itoobiya iyo Yemen IWM.—

Caalamku wuxuu ku hallaynayaa iney wax ka qabtaan Ciidanka Amisom iyo kuwa ka socda dalalka deriska ah sida Kenya iyo Itoobiya oo laga yaabo iney dalka u soo galeen sababo kala duwan oo ay ka mid noqon karaan arrimo dhaqaale, tababbar iyo nabadgelyo. Ciidanka noocan ah inuu wax ka qabto amniga Soomaaliya wuxuu u baahan yahay waqti dheer , dhaqaale badan iyo inuu wax badan ka barto duruufta iyo dhaqanka soomaaliya. Waxaa laga yaabaa Ciidammadani iney kala wareegaan Magaalooyin waaweyn dabadeedna ay shabaabku u durkaan meelaha Miyiga ah iyo tuulooyika fogfog oo ay kasoo qaadi karaan dagaallo ku dhifo oo ka dhaqaaq ah kaas oo muddo dheer inuu qaato laga yaabo. --

Sida hadda lagu arkay ciidammadani meelaha ay ka hawlgaleen waxay shacbiga u geysteen khasaarooyin badan oo naf iyo maalba leh, taas oo markeeda laga yaabo iney Shabaabku ka faa’iideysan karaan muddada fog. sidaas waxaa la mid ah ciidammada soomaaliyeed oo aan Mushaar iyo Xannaano fiican la siin Dishibiliin iyo akhlaaq wanaagsanna aan lahayn haddii ay shacbiga ula dhaqmaan si xun waxay keeni kartaa in shacbigu uu la shaqayn waayo ciidammada iyo barnaamijyada ay dawladdu waddo.--

Sidaas darteed waxaa habboon in la qaado hawlgal caalamku iska kaashado oo muddo kooban lagu soo afjaro, kaasoo ay ku jirto tababbarka iyo qalabaynta ciidammada Soomaaliya

maxaa yeelay waa ciidanka dalka oo keli ah kan meel kasta oo ay galaan argagixisadu ugu  geli kara ,markaa ka dib waa in dalka doorasho laga qabto oo loo dhiso dawlada isku filan, sidii laga sameeyey Afganistaan iyo Ciraaq.--

## Amniga Gudaha

Xagga amniga waxaa jira amni xumo aad u baahsan oo gaar ahaan ka jirta degmooyinka ay dawladdu ka taliso. Ciidammada dawladda dad dharkooda wata oo hubaysan ayaa jira, kuwaas oo ku lug leh ama shacbiga u geysta burcadnimo hubaysan, kufsi iyo isbaarooyin. Waxa jira dad inta wax dila aan la qaban Karin, inkastoo dad dad diley la qisaasay, haddana ninka xoogga leh weli  si buuxda looma qaban karo , sharcigana lama horgeeyo. Marar badan waxaa la maqlaa Guddoomiyaha maxkamadda ciidammada oo ka cabanaya inuu gacan ka waayey talisyada ciidammada oo soo qaban waayey gacan ku dhiiglayaal dad diley si sharciga loo horgeeyo. Cidammada dawladda ayaa marar badan dhexdooda is rasaaseeya oo ay dad badan oo rayid ah ku dhintaan waxna aan laga soo qaadin. Shacbiga waxaa lagu laayaa meelaha kontoroollada marka ay lacag bixin waayaan ama ay la kulmaan is rasaasaynta ciidammada dhexmarta waxna lagama soo qaado.



Waxaa jirey qaraxyo ismiidaamin ah oo dad badan oo bulshada qiima weyn ugu fadhi yey lagu laayey kuwaas oo ay ka mid ahaayeen Wasiirro, Dhakhaatiir, Arday , Saraakiil, Culumaa'uddiin iyo dad badan oo sharaf iyo qiime ku lahaa bulshada dhexdeeda.Qaraxyadaas waxaa ugu waaweynaa Qaraxii Beletweyne oo ay ku dhinteen dad badan oo ay ka mid ahaayeen Cumar Xaashi Aden Wasiirkii Amniga ee dawladda ku meel gaarka ah iyo danjire Cabdikarin Faarax Laqanyo,



Qaraxii Shaamow 03.12.2009,kaas oo ay ku dhinteen arday ka qalin jebineysey kulliyadda daawada,Dhakhaatiir iyo 4 Wasiiro oo ay ka mid ahaayeen Ibraahim Xasan Caddow, Axmed Cabdullaahi Waayeel,Qamar Aden Cali iyo Suleymaan Colaad Rooble,.Qaraxii ka dhacay Hargaha iyo Saamaha oo ay ku dhinteen dad 100 kor u dhaafay oo arday waxbarasho debedda u aadi lahayd u badnaa iyo qaraxyadii ka dhacay Hoteel Muna,Garoonka Diyaarada Muqdisho,Xerada Sheellare iyo kii lagu dilay Wasiirkii Amniga Cabdishukuur Sh Xasan Faarax iyo kii ka dhacay Golaha Murtida iyo Madadaalada oo waqtigaas uu ku sugnaa Ra'iisul Wasaaruhu Cabdiweli Maxamed Cali.

Marar badan waxaa dhacay in lagu diley xildhibaanno, Saraakiil, dad shacbi ah iyo Weriyeyaal ay ugu dambeeyeen Agaasimihii idaacadda Shabeelle Xasan Cismaan (Fantastic) iyo Cabdisalaan Xasan Xiis (Horn Cable), Abuukar Xasan Kadaf (Soomali Weyn) iyo Cali Axmed Cabdi oo Gaalkacyo lagu diley,Waxa jirey dhacdooyin xasuuq weyn la geystey sida

tii Isbitaal Banaadir hortiisa ka dhacday iyo tii Tiyaatarka hortiisa ka dhacday.. Dhacdooyinka qaarkood waxa la sheegay in dad loo qabtay hase yeeshee sharci lama geyn oo lama garanayo meel ay ku dambeeyeen. Xukuumaddu waxay mar kasta sheegtaa iney dhacdooyinkaas baareyso hase ahaatee wax qabad la taaban karo lagama hayo, arrimahaas waxaa asal u ah karti  xumada iyo waxqabad la'aanta xukuumadda dalka ka jirta.

## <u>2.Dastuurka--</u>

Samayn dastuur dalku uu yeesho waa arin lagama maarmaan ah,maadaama uu Dastuurku yahay sharciga ugu sarreeya shuruucda dalka iyo saldhiga shuruucda dalka oo dhan.Iyadoo ay lagama maarmaan tahay in isaga laftiisa uu ku salaysnaado shareecada islaamka.waa Dokumentiga laga dheehan karo habka siyaasadeed iyo sida ay u dhisan yihiin Hayada dawlada iyo qaabka ay u shaqeeyaan.waxa loo baahan yahay in dastuurkaas diyaarintiisa ay ka shaqeeyaan dad aqoon gaar ah u leh qaababka Dasaatiirta loo diyaariyo, dad aqoon u leh dhaqanka soomaaliyeed iyo Diinta Islaamka. Doodihiisa waa in laga qayb geliyo qaybaha kala duwan ee bulshada si ay gorgortan uga galaan waxa ay doonayaan si uu u noqdo mid ku dhisan heshiis Qaran oo aan kooxina koox ku khasbin waxa ay doonayso,markaas ka dibna waa in dadweynaha loo bandhigo oo Afti Qaran lagu ansixiyo iyadoo dalku nabad yahay , oo qof waliba codkiisa si xor ah u dhiiban karo. Dastuurku waa inuu daweeyo arrimaha dadku isku hayaan. Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa Somaliland waxa ay leedahay waan ka go'nay Soomaaliya waxaan nahay

Dawlad Madaxbanaan oo xadkeeduna yahay kii ingiriisku kaga tagay,Puntland waa dawlad Goboleed xadkeedu uu yahay dhulka Beelaha Harti ay degaan khaatumo state oo labadaas maamul dhulka ay sheeganayaan deggani waxay doonayaan inay aayahooda ka taliyaan oo ay dhistaan Maamul ka madaxbanaan oo iyagu iska leeyihiin,Dastuurka waxa la doonayaa inuu xalliyo kala qaybsanaanta Magaalada Gaalkacayo oo hadda u kala qaybsan Maamulka Puntland iyo Galmudug.waxa la doonayaa inuu xalliyo dadka maamullada samaystay iyo kuwa weli dhulkooda la haysto oo aan awoodin inay maamul u dhistaan sidii ay wax isugu darsan lahayeen.Arrintani ma aha mid sahlan oo u baahan in lagu deg dego,haddii la doonayo in dalka loo sameeyo dastuur wanaagsan oo saldhig u noqda xallinta dhibaatooyinka dalka ka jira, waxa ay u baahan tahay in waqti ku filan la siiyo oo aad looga gorgortamo.--

Marka la eego xagga sharciga axdiga ku meel gaarka ah samaynta dastuurka wuxuu u xilsaarayaa guddi Madaxbannaan kaas oo aad loogu caddeeyey Axdiga habraaca shaqo ee uu u marayo samaynta dastuurka (Eeg qodobka 11 ee Axdiga ku meel gaarka ah) . Guddigaas oo baarlamaanka laga ansixiyay xeer Madaxweynahana lagu magacaabay. Xukuumaddu waxa ay magacawday guddiyo kale oo dastuurka ka shaqaynaya iyadoo aan loo marin qaab sharci ah. Guddigu haddii farsamo ama khubaro kale ay u baahan yihiin waxa wanaagsanaa inay iyagu qortaan laguna gacan siiyo laakiin ma jirto cid kale oo inta iyaga kala wareegta sharci u leh inay dastuur qaran sameeyaan,haddii aan si sharci ah looga wareejin shaqadaas. Xukuumadda waxaa u furan haddii ay dhaliisho shaqada guddiga ama ay u baahato in si uun wax looga beddelo qaabka dastuurku u socdo iney soo samayso hindise sharci oo ay baarlamaanka hor keento si uu uga doodo., --

## Wax ka Beddelka Axdiga Iyo Sharciyaynta Guddiyada iyo Shirweynaha --

Marka aad hoos u eegto Road-Map-ka waxay ahayd in is beddel lagu sameeyo axdiga ku meel gaarka ah ugu dambayn 19 sept 2011 si wax looga beddelo qodobbada Axdiga oo hor istaagi kara shaqada la wado hase yeeshee waxaa la yaab leh in Road-Map-ka u xilsaaro inay shaqadaas qabtaan Gudoomiyaha Baarlamaanka iyo guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka iyo Wasiirka Garsoorka kuwaas oo aan awood sharci u lahayn inay axdiga wax ka baddelaan.waa nasiib darro in dadka Masiirka dalka ka talinaya aysan garanayn sida axdiga wax looga badelo iyo cida xaqa u leh inay wax ka badesho.Sidoo kale cidda la horgaynayo Qabyo Qoraalka Dastuurka oo laga rabo inay oggolaato waa kooxda isku magacawday Steak Holders oo aad mooddo sida ay u dhaqmayaan inay qabanayaan shaqadii Baarlamaanka .Guddiyada iyo shirarka la xiriira oggolaanshaha dastuurka dhammaantood waxa ay u baahan yihiin in shuruuc lagu sameeyo Baarlamaankuna ansixiyo.qaybta ugu dambaysa waxa ay sheegaysaa in la soo saarayo shuruuc badan sida sharciga doorashada.

## Xukuumadda oo aad Mooddo iney Go'aansatay iney Sharciga Garab marto,--

Hawlaha hadda dalka ka socda waxay dhammaantood u baahan yihiin in sharci lagu saleeyo, si ay sharci u noqdaan. Samaynta dastuurka cusub, qaban qaabada shirweynaha dastuurka iyo yaraynta xubnaha Baarlamaanka waxay u baahan tahay in shuruuc lagu xaddido. Waxa kale oo loo baahan yahay in wax laga beddelo axdiga ku meelgaarka ah si loo sharciyeeyo hawlaha la wado. Waxaa la yaab leh in samaynta dastuurka oo masiirka dalka oo dhami ku xiran

yahay loo maro waddo aan sharci ahayn si loogu adeegsado gaaritaanka dano siyaasadeed oo gaar ah. Sharci lagu sameeyey si sharcidarro ah ma noqon doonaa mid sharci ah oo dalka ka dhaqan gala, waa wax la arki doono?.

## **Soo Xulidda Ergooyinka Shirweynaha Ansixinta Dastuurka,**

Sida ku cad Mabaadii’da Garoowe dastuurka waxaa ansixinaya 1000 qofood oo ay soo xuleen dad la soo xulay. Dastuurku waa wax qof kasta oo Soomaali ahi uu xaq ku leeyahay mana noqon karo wax ay ansixin karaan dad gaar ah oo la soo xushay. Waxaa loo baahan yahay in la dhegeysto qofka diiddan iyo kan taageersan ee maahan inta taageersani inta meel isku xirtaan iney ansixiyaan Dastuur Qaran. Waxa wanaagsanaan lahaa marka uu soo dhammeeyo guddiga dastuurku qabya qoraalkooda in loo gudbiyo golaha wasiirrada iyaguna u gudbiyaan barlamaanka dabadeedna guddi ka kooban barlamaanka iyo khubarada dastuurku soo tifaf tiraan si dadweynaha loogu bandhigo.Markaa ka dib haddii ay lama huraan noqoto in dad koobani ansixiyaan waa in la tilmaamo meelaha ay dadkaasi ka imaanayaan sida Haweenka, Dhallinyarada, Culummada,Axsaabta Siyaasadda, Gobollada oo lagu daray xubnaha Barlamaanka IWM.

Arrinta ku saabsan soo xulidda xubnaha barlamaanka waxaa xaq u leh beel Hoosaadyada(Sub-Sub clans) waxaana siinaya axdiga ku meel gaarka ah, waxa keli ah oo laga hubinayaa iney shuruudihii loo dhigay xildhibaanka soo buuxiyeen. Sax ma aha in boos walba laba qofood loo soo sharraxo sababtoo ah waxaa imaan kara in labada qofood la kala shukaansado oo midkood heshiis hoose lala galo,si hadhow codkiisa looga faaiideysto.

## **Federaalka:--**

Fikrada ku saabsan in loo qaybiyo dalka Soomaaliya maamullo yar yar oo tabar yar.Waa arrin laga soo shaqaynayey muddo dheer oo ay wataan wadammada



deriska ah oo dareen ka qaba fikradda Soomaali weyn oo saldhig u ahaan jirtay Qarankii soomaaliyeed ee xoogga lahaa.Somaaliya ilaa xornimadii ka hor waxa jirey dhaqdhaqaaq iyo fikir ku saabsanaa in dadka ku hadla af soomaliga la mideeyo, taas oo sababtay dagaallo ay jamhuuriyaddii soomaliya la gasho dalalka deriska ah.

Markii dawladdii dhexe ee soomaaliya ay burburtay dalalka deriska ah waxay aad uga shaqeeyeen inaanu dib usoo noqon Qaran Soomaliyeed oo xoog leh oo mid ah. Markii hore waxay fekereen in dagaallo iska socdaan oo rag dagaal oogayaal loo bixiyey laysku hubeeyo taas oo muddo shaqaysay, hase yeeshee waxa laga baqay in arrintu faraha ka baxdo oo la xakamayn waayo hubka badan oo ku qulqulaya dalka, sidaa darteed waxa la goostay in soomaalida loo dhiso Dawlad taag daran , oo laga maamulo urur Goboleedka IGAD oo ay dawladaha deriska ahi gacanta ku hayaan.--

Markii uu dawlad xilligeedu soo dhowaado waxa caado noqotay in la baabii'yo oo mid cusub loo guuro iyadoo lagu salaynayo shirweyne Qaran oo soomalida loo qabto.Dhammaan shirarkaas waxa loo dhigayay in looga hadlo sidii soomalida looga dhigi lahaa dawlad Federal ah.--

Shirkii Carta Soomalidii ka qayb gashay waxay ku adkaysteen in arrinta Federaalku ay ku hirgeli karto oo keli ah marka shacbiga afti looga qaado oo ay saas doortaan.--

Fikirkaas waxa la sii ambaqaaday shirkii Embagathi oo Kenya lagu qabtay oo Duruuftiisana si fiican ay uga soo shaqeeyeen dawladdihii danaynayey, oo dadkii shirkaas ka qayb galay ay hogaanka u hayeen qabqablayaashii dagaalka oo hirgelinta fikirkaas in badan lagu soo tabcay.--

Shirku wuxuu qaatay in la qaato nidaamka Federaalka ah,laguna hirgeliyo muddo laba sano iyo Bar ah haddii la hirgelin waayana xukuumaddaas la rido. Waxa arrintaas murankii ka bilawday lagu riday dawladdii Cali Maxamed Geeddi iyadoo khalkhal lagu geliyay tii Nuur Cadde iyo tii Cumar Cabdirashiid. --

Hirgelinta fikirkan waxay u galeen dalalka deriska ah halgan badan iyadoo dad badan oo gobollo kala duwan laga dhaadhiciyay inuu xalku ku jiro inay sameystaan maamullo u gaar ah.--

Waxa lagu guulaystay in Somaliland ay gooni isu taag ku dhawaaqdo,Putlandna ay noqoto astaanta u taagan in soomaliya maamullo Federal ah loo qaybiyo ,waxaa laga yaabaa iney taasi tahay sababta ay uga badbaadeen qaska ka jira koofurta iyo Bartamaha. Waxa arinta aad u sii xoojiyay siyaasadda Maraykanku qaatay ee labada weji ku shaqaysa [Dual Track Policy], halkaas oo maamul Gobolleedyada hadda la qorshaynayaa ay gaadhayaan 26. Fikirkani ma aha mid soomalidu doorατay ee waa mid kor looga keenay oo lagu khasbayo.--

Arrimaha hadda socda ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay waa in la helo qaab loo maro hirgelinta Nidaam Federal ah ee soomaliya iyadoo loo adeegsanayo Road-Map-ka iyo samaynta dastuurka, waana wax ay dawladaha deriska ahi ay muddo dheer ku taamayeen kana shaqaynayeen iney mar uun soomaaliya gobollo yar yar u kala qaybiyaan.

Madaxda Dawladaha deriska ahi weligood ma qarsan ineysan Soomaaliya dawladnimo la rabin, xasuuso oraahdii Madaxweynihii hore ee dalka Kenya Arab Moi iyo Wasiirka Arrimaha Dibedda Watangula oo hore u qiray ineysan Soomaaliya dawlad la rabin, akhriso maqaal uu qoray wargeyska Daily Nation oo sheegay in Kenya iyo Itoobiya ay qaybsan doonaan Soomaaliya iyagoo u maraya Maamulka ay Soomaaliya u dhiseen .--

## <u>Dawladaha Deriska ah Dani ma ugu jirtaa Soomaaliya Gobollo ah.—</u>

Dagaalka sokeeye ee Soomaaliya iyo Itoobiya ka dhacay wuxuu gobolka ku soo kordhiyey iney aad isu dhexgalaan shucuubta ku nool gobolkan geeska Afrika ayna soo yaraadaan cuqdado badan o o ay kala qabeen shucuubta ku nool geesku.

Dadka Soomaaliyeed waxay u qaxeen dalal badan oo caalamka ah oo ay ugu muhimsan yihiin kuwa deriska ah, halkaas oo ay masaalix iyo ganacsi badan ku yeesheen ayna



doonayaan iney sii horumariyaan;,dad badan oo u dhashay dalalka deriska gaar ahaan keenya iyo Ethopia waxay shaqooyin iyo ganacsiba ku yeesheen Soomaaliya,kaasoo haddii dalku dego la sii wanaajin karo. Sidaas darteed waxaa ka muuqda gobolka saadaal cusub oo sheegeysa in shucuubta gobolku ay leeyihiin fursado cusub oo u suurtagelin kara is dhexgal iyo wada noolaasho ka fiican kii hore.

Waxaa lays weydiin karaa hadda dawladaha deriska ah dani ma ugu jirtaa in soomaaliya loo qaybiyo maamulo yar yar.

Marka la tixgeliyo ifafaalaha cusub ee ay la soo baxday Alqaacidda oo hadda noqotay mid caalami ah oo aan dal gaar ah ku koobnayn, waxa la oran karaa iney u wanaagsan tahay soomaaliya iyo dawladaha la deriska ahba loo dhiso dawlad xoog leh oo dalalka deriska ka ammaan gelin karta dadkeeda kuna filan maamulka xuduuddaheeda.Haddiise laga dhigo maamullo yaryar oo inta badan qabiil ku salaysan, waxay muddada fog noqonayaan meelo ay argagixisadu ku badbaaddo, oo waxyeello badanna uga geysan karto dalalka deriska ah iyo caalamka intaba.

**Dib u heshiisiinta-**

Marka la eego xaaladda dalku uu hadda ku sugan yahay dib u heshiisiintu waa arrin muhiim ah oo loo baahan yahay.Waxaa jira cabashooyin badan oo xal u baahan, kuwaas oo ay ka mid yihiin:--



Dad sheega naya in dad kale dulmi ku haystaan degaannadoodi,sida kooxo ama urruro Maamullo sameystay oo dad kale xoog ku maamula.--

I. Waxa jira qabiilooyin uu ka dhaxeeyo dagaallo daaqa iyo deegaanka ku salaysan,--
II. sidoo kale waxa jira khilaaf siyaasadeed oo noocyo badan iyo wejiyo badan ku imaan kara.--

Sidaasi darteed waxa loo baahan yahay dib u heshiisiin noocyo badan leh oo saldhig u noqon karta in la gaaro xal waara. Marka aan taabanno meelaha ugu muhimsan oo la

oran karo xal soomaaliyeed waa laga dooni karaa waana in laga fekero waxa ka mid ah:--

a) Mushkilladda ugu weyn ee jirta waxa lagu sheegi karaa sidii loola xaali lahaa kooxda Alshabaab oo ah dhibaatada ugu weyn ee hor taagan dhismaha Qaranka soomaliyeed. Road-Map-ka ma sheegayo qaabka dib u heshiisineed ee ku habboon iyo wixii isku day ah oo la samayn karo si loo furdaamiyo dhibaatadaas. Waxaa la ogyahay in Afganistaan oo Toban sano uu ka socdey dagaal la mid ah kan dalkeenna ka socda ayna wadeen ciidammo ka xoog badan kuwa nala jooga in ugu dambayn ay ka fursan weydey in lagu dayo dib u heshiisiin. Waxa keliya oo loogu talo galay waa in lagu xaliyo xoog ciidan iyo in dagaal looga guulaysto.--

b) Sidoo kale waxaan ka muuqan sida loola xaajoonayo Somaliland oo ku dhawaaqday iney gooni isu taagtey,--

c) waxa keliya oo Road-Map-ka lagu xusay waa Ahlu Sunna iyo khilaafyada yar yar ee deegannada qabaa'ilka ka dhaca kuwaas oon iyana waxba laga qaban.--

d) waxa intaas sii dheer khilaafaad badan oo soo if baxay intii Road-Map-ka la sameeyay ka dib,ama la oran karo waxaaba keenay Road-Map-ka waxaana ka mid ah: --

i} khilaaf aad u xoog leh oo ka soo if baxay baarlamaanka dhexdiisa kaas oo laga yaabo inuu halis geliyo Sharciyadda iyo hirgelinta Road-Map-ka iyo guud ahaan siyaasadda dalka.-

ii) wuxuu kale oo khilaafkaasi dhex galay ururka Ahlu Sunna oo in badan ka cawda dadka shirarka uga qayb gala oo hadba la xusho qofka markaa la danaynayo marar bandanna la arko iyagoo shirar jaraa'id qabanaya oo sheegaya inaan si fiican loola dhaqmin.--

iii) Burbur ku socda Mamulladdii horey u jirey sida Somaliland iyo Puntland oo ay ka soo hoos baxeen maamullo cusub oo doonaya in la aqoonsado lagana tixgeliyo arrimaha Siyaasadda dalka maamulladaas waxaa mid ah :Khaatumo State, Awdal State, Raas Casayr iyo kuwa kale sidoo kale koofurta iyo bartamaha waxaa ka jira maamullo u baahan in talada dalka laga tixgeliyo--

e) Dagaallada u dhaxeeya beelaha oo iyaguna meelo badan ka jira iyagana wax macno leh oo laga qabtay ma jirto.Hawlihii dib u heshiisiinta ee la qorsheeyay in la qabto ee Road-Map-ka ku qornaa waxba lagama qaban haba yaratee,sidaas darteed waxa muuqata inaan markii horeba ujeeddadu ahayn in dib u heshiisiin wax laga qabto,waxa keliya ee dib u heshiisiinta Road-Map-ka loogu soo daray in ujeeddooyin kale lagu gaaro barnaamijkana lagu qurxiyo.--

## <u>4-Dawlad Wanaagga iyo Maamulka Maaliyadda-</u>

Dhibaatada ugu weyn ee soomaliya haysata maanta waa Dawlad xumo,sida Hayadihii dawladda oo shaqadoodii aan qaban Karin,ammaanadii oo luntay,wax sharci ah oo la dhawro oo aan jirin iyo xisaabtan la'aan baahday.--

## <u>Waxyaabaha Road-Map-ka lagu sheegay waxa ugu muhiimsan in:--</u>

a) Dakhliga dawladda si fiican loo diwaan geliyo wixii soo galana Bankiga lagu xareeyo.Arrintaasi waa fiican tahay waxase ka horreysa in shuruucdii Maaliyadda iyo tariifooyinkii wax lagu qaadi jirey dib loo habeeyo,oo la waafajiyo xaaladda dalku ku sugan yahay, waxa la qaadayana shuruuc lagu saleeyo.Tariifadii hore waxay ku salaysnayd shillin Somali midda hadda la qaadana waxa lagu bixiyaa Doolar.<u>W</u>axa kale oo loo baahan yahay in shaqaalaha Maaliyadda ka shaqeeya

laga dhiso dhinacyo badan si ay shaqooyinkooda si hufan ugu gudan karaan.waxa qorshuhu soo jeedinayaa in sharci loo soo saaro la dagaalanka Musuqmaasuqa guddina loo sameeyo.sharcigaas weli Baarlamaanka lama keenin in kasta oo guddigii la sameeyay.

b) Arrintu sida ay hadda u jirto ma aha mid guddi wax ka qaban karo waxaan u arkaa in dhismaha guddigu uu noqon karo oo keli ah wax ii dheh ah oo loo muujinayo in Hayadaha Deeqda bixiya lagu qanciyo ama dano kale laga leeyahay,Si guddi la dagaalama *Musuqmaasuqa* uu shaqo fiican u qabto waxa loo baahan yahay in Hayado badan oo Qaran oo shaqadiisa Aas-aas u ah la xoojiyo kuwaas oo ay ka mid yihiin Xisaabiyaha guud,Hanti dhawrka guud,Xeer ilaalinta ,Maxkamadaha iyo Booliska,si ciddii musuq lagu helo loo qaban karo oo sharciga loo horgeyn karo.

c) Guddigu wuxuu u baahan yahay xasaanad iyo xannaano ay uga badbaadi karaan in lagu shaqaysto ama loo caga jugleeyo.—

**Hagaajinta Habsami u socodka Shaqada Qaranka--**

Marka qiimayn lagu sameeyo guud ahaan habsami u socodka hawlaha loo hayo Qaranka soomaaliyeed ma jiro maanta xafiis dawladdeed oo si hufan uga soo baxa shaqadii loo abuuray,Ma jirto aqoontii lagu socodsiin lahaa shaqada dawladda iyadoo dhammaan dadka xafiisyada jooga ay shaqada ku cusub yihiin wax shuruuc ah oo ay ku shaqeeyaanna aysan jirin.

Marka aad eegto Miisaaniyada ma jiro shaqaale joogto ah iyo mid ku meel gaar ah midna, waxa keli ah ee ku qoran waa gunnooyin taas oo sidii la rabo loo isticmaali karo .Ma jirto

qaab mushahar oo dadka lagu shaqaaleeyo iyo heshiis lala galo shaqaalaha midna.

Xafiisyo badan oo dawladda shaqaalahoodu wuxuu is la beddelaa masuulka markaa jooga sidaa darteed ma jirto waayo aragnimo shaqo oo la kala dhaxlo,Xafiiska Madaxtooyada, Barlamaanka iyo kan Ra'iisul wasaaraha midkoodna ma joogaan shaqaalihii la soo shaqeeyey masuulkii xafiiska uga horreeyey Wasaaradaha iyo xafiisyada kalena waa la mid, taasi waxay keeneysaa inaan la helin shaqaale khibrad leh iyo shaqo raadraac leh.

Afartii sanno ee la soo dhaafay shuruucda xukuumaddu ay Baarlamaanka u soo gudbisay 10 ma dhama,taasi waxay muujinaysaa inaan dalkan shaqo loo hayn,Shaqada laga qabto xafiisyada dawladda inta badan waa qaabbilaad , kormeer iyo shirar maxaa yeelay waa shaqooyin aan u baahnayn khibrad iyo aqoon. Shaqaalaha dawladda laguma xusho aqoontooda,waaya aragnimadooda iyo kartidooda, waxaana inta badan lagu qoraa weji garad iyo arrimo kale oo aan caddaaladda shaqa ku lahayn.

## Fulinta Sharciga iyo Garsoorka

Garsoorku waa Hayadda saddexaad ee maamulka dalka waana meesha ay taallo sirta dawlad xumada waddankan haysata. Waa meesha haddii muran dhaco ay tahay in la aado oo lagu kala baxo loona hoggaansamo xukunkooda, ciddii u hoggaansami weydana lagu khasbo. Haddii sharci adag dalka ka jiro qof kastaa wuxuu ku khasban yahay inuu sharciga ka baqo. Haddaba Hayadda ahmiyaddaas leh lama siin mudnaantii ay dalka ku lahayd looma dhammaystirin Amkaaniyaadkii, Dhaqaaliyhii iyo ammaankii ay ku shaqayn lahayd,Lama garanayo waxa xafiisyada Barlamaanka, xafiiska Ra'iisul wasaaraha iyo Madaxtooyada ciidammadu ugu

wareegsan yihiin garsoorkuna uu u yahay meel aan amni lahayn, aan dhaqaale lahayn oon xasaanad lahayn. Marka aad Miisaaniyadda eegto waxaad arkaysaa in Wasiir ku xigeenka Barlamaanka xubinta ka ah uu Mushaarkiisu gaaro US D 3500/, meesha Guddoomiyaha Maxkamadda sare uu Mushaarkiisu yahay USD 1000 Garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale iskaba daa waxay ku nool yihiin xaalad nolol xumo tii ugu darnayd. Waxaa intaa dheer Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxaa loo beddelaa sida shaqaalaha caadiga ah,Waddanka halkaas garsoorkiisi la dhigay lagama yaabo inuu caddaalad iyo horumar ku tallaabsado.

Waxa kale oo dalka ka maqan Maskax Sharci oo sharciga aamminsan oo u diyaar ah iney iyadu sharciga u hoggaansanto ummaddana ku dhaqdo,Ilaa hadda waxaa la awoodi la'yahay in lagu dhaqmo axdiga ku meel gaarka ah oo qodobbo dhawr ah ka kooban, isagana markii lagu murmo maxkamadda lala ma aado ee qof kasta meeshii uu taageero ka raadsan karo ayuu aadaa inta bandanna waxaa Rafcaankaas loola tagaa bulshada caalamka oo aan marna oran war sharcigiinna ku kala baxa ee ciddii ayaga danahooda wadda u hiilisa.sharciga lama dhawro,Maxkamadahana laguma kalsoona.waxa daliil u ah in murannada dhex mara Madaxda aan marna Maxkamaha loo geyn, hadii go'aan ay soo saaraanna aan la tixgelin. waxaa ka mid ah markii Ra'iisu lwasaarihii Maxamed Cabdullaahi farmaajo loo codaynayey in la isku qabsaday ma gacan taag ayaa loogu codaynayaa mise Qarsoodi,dabadeedna ay Maxkamadda sare go'aamisay in la raaco dastuurkii lixdankii kaas oo sheegaya in loogu codaynayo gacan taag iyo aqlabiyad fudud.Guddoomiyaha Baarlamaanku wuxuu qaatay inuu ku dhaqmo xeer hoosaadka



iyo gacan taag, hase yeeshee markii codkii la qaaday waxa la waayey aqlabiyaddii loo baahnaa haddii Xeer hoosaadka la raaco,Waxay ku kaliftay Guddoomiyaha inuu xukuumadda ku ansixiyo si sharci darro ah,taas oo ansax ahaan lahayd hadii uu raaci lahaa go'aankii Maxkamadda.

## Xoojinta Hayada Lafdhabarka u ah Hagaajinta Maamulka iyo Dhaqaalaha.

Hayado badan oo laf dhabar u ah Dawlad Wanaagga iyo inuu waddanku si fiican u shaqeeyo oo aad u tabar daran hadda ayaa jira kuwaas oo ay ka mid yihiin hanti dhawrka guud, Xisaabiyaha guud iyo Hayadaha kale oo ku shaqada leh ilaalinta hantida Qaranka. Hayadahaasi waxay u baahan yihiin in loo sameeyo shuruuc u gaar ah oo shaqadooda iyo awoodaha ay ku fulinayaan si fiicanna loogu qeexo, sidoo kale waa in loo dhammaystiro wixii u fududayn lahaa waxqabadkooda. Shaqa xumada hayadahaan waa wax ka mid ah waxyaabaha asaaska u ah dawlad xumada waxaana keenay xukuummadda oo aan hamuun u qabin hagaajinta hayadahan cabsina weligeedba ka qabta haddii hayadahan awood iyo madaxbannaani la siiyo kana baqaysa iney iyada ku soo jeestaan.

Waxaa hubaal ah maqnaanshaha hayadaha ilaaliya dhaqaalaha dalka iyo kuwa sharciga oo ay Maxkamadaha iyo Barlamaanku ka mid yihiin ay tahay sababta dalkeennu u noqday dalka adduunka ugu musuqmaasuqa badan, ugu maamul xun ugana hufnaanta yar.--

Waa wax jira haddii la xoojiyo hayadahan iney hor istaagi karaan waxyaaba badan oo xukuumaddu ku dhaqmi jirtey hase yeeshee in lays kontoroolo oo masuul walba uu ku ekaado awoodda uu sharcigu siinayo waa waxa adduunka

horumaray ay ku hana qaadeen innagana naga maqan oo aan u baahannahay.--

**Gurmadka Barakacayaasha--**



Dalka waxaa ka dhacay Abaar iyo Colaad aad u weyn oo keentay dad badan oo soomaaliyeed iney ka barakacaan degaannadoodi oo qof walba uu wejiga saaray meel Ala meeshii uu ka heli karo wax uu ku noolaado. Waxaa dadka ka dhammaaday Xoolihii ay dhaqan jireen iyo Beerihii oo abaarsaday taasoo meesha ka saartay wixii ay noloshooda ku maareyn jireen. In badan oo Barakacayaas ka mid ah waxay naftooda kula soo carareen Magaalada Muqdisho, Gurmad aad u xooggan oo dadka Magaaladu u galeen samatabixinta nolosha barakacayaasha iyo dadaal Warbaahinta soomaaliya iyo tan caalamku u galeen waxay keentay in gurmad xoog leh ay sameeyaan dadka soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaanba iyo caalamka iyo si gaar ah oo hagar la' aan ah Waddammada Muslimka ah oo ay hormood ka yihiin dalalka Turkiga, Kuwayd, Iiraan, Qadar iyo dalal kale oo Muslim ah. Waxaa dalka soo booqday Madaxweynaha Jabuuti iyo Ra'iisul Wasaaraha Turkiga iyo madax kale. Hasee yeeshee inkastoo si hagar la'aan ah iyo Deeqsinimo badan la muujiyey waxaa jirey cabashooyin tira badan in la xado, la dhaco oo aan la gaarsiin Barakacayaashii wixii caalamku dadkaas ugu deeqay,Xadgudubyo joogto ah oo ay ka mid yihiin kufsi iyo dhac ayey ka cabanayaan dadka barakacayaasha ah oo xeryaha qaxootiyada ku nool,Inkastoo deeqo badan la helay oo aan laysku diiddanayn waxa

curyaamiyey in sidii la rabey looga faa'iideysto waa maamul xumada iyo dawlad xumada dalka ka jirta'. Inkastoo Madaxweynaha iyo Ra'iisul wasaaruba ay sheegeen iney arrintaas wax ka qabanayaan, haddana ballan qaadkaas oo si joogto ah xukuummadda looga maqlo wax miro ah kama soo bixin.

## ***Mabaadii'da Garoowe--***

Taariikhdu markay ahayd 21-23 December 20011, ayaa waxaa shir lagu qabtay Magaalada Garoowe caasimadda Dawlad Goboleedka Puntland. Shirka waxaa ka qayb galay kooxihii saxiixay Road-Map-ka waxayna kasoo saareen waxa ay ugu yeereen mabaadii'da Garoowe, oo lagu soo koobay laba arrimood oo kala ah:-

1-Qaabka, Tirada iyo Shuruudaha lagu soo xulayo Barlamaanka Federaalka ah iyadoo lagu salaynayo Dastuurka cusub.-

2-Oggolaashaha Dastuurka Federaalka ah kaas oo lagu ansixinayo shirweyne Qaran.-




Shirka Garoowe wuxuu xoogga saaray sidii kooxihii isku magacaabay Saxiixayaasha Road-Map-ka ama Steak Holders ay u xoojin lahaayeen gacan ku hayntooda geeddi socodka roadmapka, una xaqiijin lahaayeen sidii wax walba ugu dhici lahaayeen sida ay doonayaan.

Waxay dejiyeen nidaamkii ay ku kontorooli lahaayeen geeddi socodka iyagoo sameeyey guddiyo u soo xulaya ergooyinka shirweynaha iyo dadka ka mid noqonaya Barlamaanka oo ay

sheegayaan iney soo xulayaan dhaqan la aqoonsan yahay iyo dad ka socda bulshada Rayidka,. Odayaasha dhaqanka oo la aqoonsan yahay waa kuwee yaase aqoonsan,annagoo og in beryahan dambe ay Wasaaradda Arrimaha Guduhu ay warqado aqoonsi siiso dad ay ku sheegto iney dhaqan yihiin, dadka bulshada rayidka hase yeeshee yaa soo magacaabaya. Waa meelaha shaki la'aan wax laga Musuqmaasuqi karo, waana si ay ku urrursan karaan dad u fuliya waxa ay doonayaan.--

Waxaa si cad loo burriyey qodobbo horay ugu jirey Road-Map-ka kuwaas oo ay ka mid ahaayeen in Barlamaanka dib u habayn lagu sameeyo oo hadda loo beddeley in Barlamaan cusub la sameeyo kii horena laga takhaluso, taasoo ah nuxurka Mabaadii'da Garoowe. Waxaa ku jirta Road-Map-ka in shirweynaha Dastuurka ay ka qaybgalaan xubnaha Barlamaanka hadda jira, kaas oo kooxda Garoowe ay go'aansadeen ineysan shirka imaan intii awooddooda ah.

Waxba kuma jabna waana loo baahan yahay in tirada barlamaanka la yareeyo iyo in xataa barlamaan cusub dalku yeesho, haseyeeshee waa iney noqoto talo ummaddu u wada dhan tahay oo laga wada qayb galo.

> Haddii bulshada caalamku oggolaato in kooxi u isticmaasho muquuninta kooxo kale si ay u gaarto dano gaar ah waa dhibaato dhaawac u geysaneysa sumcadda bulshada caalamka oo sii fogeyn karta xal u helidda arrimaha Soomaaliya. –

## **Natiijada laga filan karo Road-Mapka**

Marka la derso Road-Mapka iyo shaqooyinka la qorsheeyay muddada sanadka ah in la qabto waxa ka muuqata inaan aad loogu hagar bixin sida wax looga qabanayo,arrimaha

amniga,dibuheshiisiinta iyo dawlad wanaagga oo aan la caddayn sida ujeeddooyinkaas lagu gaari karo loomana waqtiyayn sida arrimaha Dastuurka iyo Federaalka loo waqtiyeeyey.

Arrimahaan waxaa aad u caddeeyey khudbaddii uu Ra'iisul Wasaaruhu ka jeediyey furitaankii shirkii labaad ee Garoowe, taas oo uu ku sheegay in arrimaha amniga, dib uheshiisiinta iyo dawlad wanaaggu ay u baahan yihiin muddo dheer, hase yeeshee waxa loo baahan yahay ay tahay in Baarlamaan cusub iyo Dastuur Federaal ah la helo, taas oo aan waxba ka tari dooninin, xallinta dhibaatada dalka haysata.Waxa xoogga la saaray dastuurka si loogu adeegsado dibuhabeynta baarlamaanka iyo hirgelinta federaalka.

Ugu dambeynta natiijada la filayo inay ka soo baxdo Road Mapka sida hadda ku talagalku u muuqdo waa arrimaha soo socda:

-Baarlamaanka oo la yareeyo, intii la awoodana la xusho si loogu adeegsado arrimaha la doonayo.

-Nidaamka federaalka oo la hirgeliyo si soomaliya looga dhigo maamulo yar yar oo tabar yar .

-In ku meel gaarka laga baxo si loo fuliyo dano qarsoon oo aan hadda la sheegin.

-Iyo inay xukunka dalka ku soo laabtaan madaxda hadda joogta si ay u dhamaystiraan waxa looga baahan yahay in la qabto marka ku meel gaarka laga baxo.

Ogow marar badan oo la isku deyey in wax laga baddelo dhammaanshaha dhulka sida badda oo ugu yaraan laba goor laysku deyey, dalkani wuxuu ku badbaaday baarlamaanka oo arrintaas ka hortegey go'aan adagna ka qaatay iyo ku meel gaarnimada oo aan siineyn awood fulin ciddii isku dayda iney gasho heshiis dalka qarannimadiisa waxyeeli kara ,taas oo la

is weydiinayo maxay tahay faa' iidada laga helayo in ku meel gaarka laga baxo iyadoo ciidammo shisheeye ay dalka ka taliyaan.

**<u>Faragelinta Arrimaha Barlamaanka—</u>**



Waxaan marar badan arkaynaa in ururro ay ka mid yihiin IGAD, AU iyo kuwa kale ay ka hadlayaan arrimaha gudaha ee Barlamaanka Soomaaliya, iyagoo doonaya iney u hiiliyaan shakhsiyaad xilkoodi gudan waayey oo ay danaynayaan, kuna handadaya aqlabiyadda Barlamaanka iney yihiin Qaswadayaal mudan in tallaabo laga qaado,Waxaa la yaab leh in ururradaasi ay ogyihiin in go'aammada ay gaaraan ay hirgeli karaan oo keliya marka ay oggolaadaan Brlamaannada dalalka xubnaha ka ah, Soomaaliyana sida dalalka kale khasab kuma aha,Waxa habboon in la ixtiraamo Qarannimada dalka oo laga daayo gacan maroojinta. In aqlabiyadda Barlamaanku isku raacdo waxa ay u arkaan iney ku jirto danta qaranka soomaaliyeed , waa wax u baahan in la dhiirri geliyo, mana mudna in la cabsi geliyo.Haddii ay dhacdo in la khasbo waxay keeni doontaa in aan dib loo helin Barlamaan Soomaaliyeed oo ku shaqeeya aragtidooda, taasina waa khatar, dawladaha iyo ururrada soomaaliya wanaagga la jecel waxaa ku habboon iney arrintaas ka hortagaan.

Wax kasta waxaa ka muhimsan in dalka loo ilaaliyo axdigiisa iyo shuruucdiisa.Inta axdiga qarankani ku dhisan yahay la laabo laguma dhegi karo Kampala Accord iyo Roadmapka,arrimahaani axdiga lama garab dhigi karo,

haseyeeshee waa barnaamijyo loo baahan yahay una baahan in laga ansixiyo Barlamaanka oo la saxo wixii khaladaad ku jira. Majirto Dimoqoraadiyo ka baxsan Barlamaanka,Waa Hayadda keli ah oo si furan doorasho xor ah u samayn karta dawladaha gobolka. Waxay u baahan tahay in la sii barbaariyo oo la xoogeeyo.

***Danaynta Dawladaha waaweyn ee arrimaha Soomaaliya***

Dawlado muhiim ah ayaa billaabay iney daneeyaan wax ka qabashada dhibaatada soomaaliya gaar ahaan markii dhibaatadii ay noqotay mid aad u weyn oo caalami ah.Dawladahaas waxaa ka mid ah dawladda turkiga iyo dawladda Ingiriiska waxaa kale oo halkan lagu xusi karaa dawladaha dalka u soo diray ciidammada oo isu xilqaamay iney amniga dalka wax ka qabtaan iyo kuwa kale ee deeqaha bixiya.

Danayntaasi waxay noqon kartaamid ahmiyad weyn leh oo lagu xallin karo arrimaha murugsan ee muddada dheer dalka soomaaliya ka taagnaa.

***I.Dawladda Biritan:***

Dawladda Ingiriisku waa dawlad weyn oo ka mid ah dawlaha joogtada ah ee Golaha amniga . Waxay ka mid tahay dawladihii soo gumaystey Soomaaliya, waxayna aqoon u leedahay dadka Soomaaliyeed. Waxaa ku nool Jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku  nool dalalka qurbaha tan ugu ballaaran , sidaas darteedna waxaa si toos ah u taabanaya dhibaatooyinka ka dhashay dawlad la,aanta iyo dawladnimo xumada.

Sidaas darteed danaynta ay u muujisay arrimaha soomaaliya waa mid mudan in la soo dhweeyo, maxaa yeelay waxaa la filayaa iney wax qaban karto haddii ay u soo jeesato.

***II.Dawladda Turkiga***

Dawladda Turkiga waa dawladda sida ugu ballaaran ugu soo gurmatey dadka soomaaliyeed waqti ay aad ugu

baahnaayeen.Dawladda turkigu sida ay hadda dalka uga shaqa bilawday waa mid dadka Soomaaliyeed ay aad uga raalli yihiin,iyagoo gurmadkii abaaaraha ka sokow ka hawlgalay meelo badan kuwaas oo ay ka mid tahay iyagoo arday badan wax barasho u fidiyey dalka iyo debedda dalkana dibudhis mashaariic badan ka billaabay.Mashaariicda hadda dalka ay ka wadaan waxaan shaki ku jirin iney mustaqbalka saldhig u noqon doonaan iskaashi wax tar leh oo labada dal dhex mari doona kaasoo shaki la'aan faa'iido weyn u yeelan doona mustaqbalka***.***

## ***III.Dalalka Ciidammada u soo diray Soomaaliya***

Dalalka ciidammadoodu dalka ka hawlgelayaan waxay u badan yihiin dalalka deriska la ah soomaaliya,kuwaas oo dani ugu jirto soomaaliya iney amni ahaato maxaa yeelay amni xumada soomaaliya ka jirtaa waxay ku faafi kartaa waddammada deriska ah iyo caalamka oo dhan.

Soomaaliya oo ah dalalka ugu xeebta dheer Afrika khayraad badan oo dihinna ay dhulkeeda ku jiraan, haddana laga billaabay in shidaal laga soo saaaro, sida la saadaalinaya laga yaabo iney noqoto dalka 7aad ee batrool leh,haddii ay ku biirto suuqa dhaqaalaha dalalka Bariga Afrika waxaa laga yaabaa iney waxtar weyn u yeelan karto dalalkaas mustaqbalka.Sidoo kale waxaa laga yaabaa in Soomaaliya iyo dalalka deriska la ah ay si fudud isaga kaashan karaan xagga amniga kaas oo faa'iido ugu jirto gobolka oo dhan***.***

## ***Shirkii lagu qabtay* Ingiriiska *(23/02/2012)***

waxaa Magaalada London (Aqalka Lancaster House) lagu qabtay shir looga hadlay arrimaha Soomaaliya, shirkaas oo ay soo qaban qaabisay dawladda Biritayn. Shirka waxaa ka soo qaybgalay 55 wafdi oo ka yimid Soomaaliya iyo caalamka. Waxaa shirka ka muuqatay sida mujtamaca adduunku u danaynayo in Soomaaliya wax laga qabto.

Dawladda shirka qaban qaabisay oo dhab ahaantii muujisay hoggaan iyo niyad wanaag ay ugu soo jeedisey caalamka si uu wax uga qabto Soomaaliya.



Hase yeeshee shirku waxba kama beddelin qaabkii hore loo qorsheeyey in loo wajaho arrimaha Soomaaliya, waxaa laga yaabaa in bulshada caalamku macluumaadka ay ka hayaan Soomaaliya iyo waxa dadkeedu ay isku hayaan aysan xog ogaal u ahayn, sidaas darteedna go'aamada caalamku ka qaato Soomaaliya loo arko mid mar kasta dhan u janjeerta oo aan caddaalad ahayn. Shirkaan waxay dadka Soomaaliyeed ka filayeen in lagu sixi doono khaladaadka ku jira roadmapka iyo geeddi socodka hadda socda, kaas oo dad badan oo Soomaaliyeed u arkaan inuusan caddaalad ahayn sida hadda uu u dhigan yahay.

Qodobka Saddexaad ee War-Murtiyeedka shirkii London wuxuu sheegayaa Mustaqbalka dalka Soomaaliyeed waxaa iska leh dadka Soomaaliyeed, hoggaanka siyaasadda Soomaaliyana waa iney ahaadaan kuwo ay la xisaabtami karaan dadkoodu. Waxaa mudan in lays weydiiyo madaxda hadda qorshaha socda horboodeysaa ma yihiin kuwo ay dadka Soomaaliyeed la xisaabtami karaan ama ugu yaraan taageero ka haysta.

Qodobkani waa mid ahmiyad gaar ah leh oo u baahan in ficil loo beddelo. Si qodobkaan si wanaagsan looga tarjumo waxaa loo baahan yahay:

A-Dadka Soomaaliyeed in la dhegeysto dareenkooda iyo welwelkooda.

Dadka Soomaaliyeed haddii la dhegeysanayo intooda badan waa ka soo horjeedaan qaabka hadda loo qorsheeyey Road

Mapka iyo Mabaadii'da Garoowe, haddii shirka London ku adkaysanayo in sidiisi loogu sii socdo geeddi socodka Road Mapka iyo Mabaadii,da Garoowe taasi kama dhigna in talada Soomaaliya ay leeyihiin dadku iyo iney u soo baxayaan madax ay la xisaabtami karaan.

Waxaa dhici karta in shirka la siiyey macluumaad aan sax ahayn oo ay saas ku dhiseen go,aankooda, sidaas darteed waxaa la gudboon qaban qaabiyaasha shirka iney si fiican u raadshaan macluumaad sax ah iyo waxa dadka Soomaaliyeed intooda badani ay doonayaan.

B-Wax kasta waa iney ku dhisnaadaan ka qaybgal buuxa ee dadka soomaaliyeed u dhan yihiin waana ineysan ku dhisnaan dano kooxeed iyo dano Gobol iyo dano Ururro iyo Dalal kale.

C-Dadka soomaaliyeed lama siin fursad ay wax ku qabsadaan, inta badan dadka horboodaya siyaasadda soomaaliya waa dad ay soo xusheen dawladaha deriska ah iyo ururrada daneeya soomaaliya. Arrimaha dalka waxba lagama weydiiyo dadka soomaaliyeed waxaa isla jaangooya ururrada, dalalka deriska ah iyo kooxo yar oo ku qaraabta magaca soomaalida.

Waxa keli ah oo soomaalidu ay meesha ka heshaa waa dhaliil iyo in aan soomaalidu wax qabsan Karin isna maamuli Karin. Laakiin runtu waxay tahay inaan soomaalida marna la siin fursad ay arrimahooda si madax bannaan wax uga qaban karaan, waana arrintaas sababta xal waara loo gaari la,yahay , waxa keli ah oo la dhegeystaa go'aammadana lagu dhisaa rabitaanka Dawlaha deriska ah iyo ururrada daneeya soomaaliya,hore ayaa loo yiri Faraska Ceelka waa la keeni karaa laakiin Biyaha lama Cabsiin karo.

D-Sida uu sheegayo axdiga ku meel gaarka ah soo xulidda xildhibaannada waxaa iska leh hoggaamiyeyaasha beelaha inta laga helayo nidaam ku dhisan doorasho xor ah, sidaas darteed waa in loo daayo hoggaamiyaasha beelaha soo

xulidda ergooyinka iyo xubnaha Barlamaanka lagana daayo caqabadaha loo dhigayo si looga faa'iideysto.
Qodobka Afraad ee warmurtiyeedku wuxuu sheegayaa in diiradda la saaray sababaha dhaliyey deggenaan la'aanta iyo calaamadaha ka dhashay sida Macaluusha, Burcad Badeednimada iyo Argagixisannimada.
Waxaad mooddaa in go,aammada xooggoodu ay ku wajahan yihiin calaamadahan dambe sidii wax looga qaban lahaa.

**<u>Wax ka qabashada burcad badeednimada</u>**

Adduunku wuxuu xoogga saaray wax ka qabashada Burcad Badeednimada ka jirta badaha Soomaaliya iyadoo badda Soomaaliya la soo dhoobay maraakiib dagaal oo dalal badan oo caalamka ah ka socda.
Waxaa la qaban qaabiyey shir ar caalami ah oo arrinta looga hadlayo waxna looga qabanayo. Dalal badan ayaa heshiisyo lala galay si ay Maxkamad u saaraan Burcad Badeedda una xiraan.



Dalalkaas waxaa loo ballan qaaday dhaqaale waxaana loo dhisay xabsiyo iyadoo la xoojiyey adeegga garsoorkooda. Waxaa la adeegsadey tabo badan oo looga hortegi karo in burcadbadeeddu ay qabsadaan maraakiibta badda socota,sida iyadoo loo oggolaaday maraakiibta qaarkood iney hub qaataan.
Waxaas oo dadaal ah oo la sameeyey ma joojin burcad Badeednimada ka jirta Badaha soomaaliya.
Waxaa circa isku shareeray kiradii Maraakiibta iyo Caymiskoodi kuwaas oo saamayn weyn ku reebay bulshooyin badan oo caalamka ah noloshoodina ciriiri geliyey.

## **Maxaa loogu guulaysan waayey wax ka qabashada Burcad Badeedda ?**

Waxaa laga yaabaa ama cadba in aan la raacin waddo sax ah oo arrintaas wax looga qabanayo laakiin waxaan caddayn waxa looga leexday waddadaas.

Waqtigii ay dalka ka talinayeen Maxkamadaha islaamiga oo ahayd lix Bilood waxaa la afduubay Hal Markab isagiina waa la soo furtay, in badan oo Burcadbadeed ahna waa la soo qabtay intaysan Badda gelin. Dhallinyaradii Burcad Badeedda ahayd waa lala hadlay waxayna oggolaadeen :

a)In qaarkood cafis qaataan oo ay ku noolaadaan dalka iyagoo xor ah ayna iska daayaan Burcadnimada.

b)Qaar kale waxay oggolaadeen iney ciidammadii ka mid noqdaan oo bulshada u adeegiddeeda ka qaybgalaan.

c)Qaar kale waxay doorteen iney kalluumaysato yaryar noqdaan.

Waqtigaas waxaa la xoojiyey ciidammada xagga berriga ah maxaa yeelay meesha hawsha burcadda laga abaabulo lagana taakuleeyo waa xagga berriga.

Waxa kale oo aad loo xoojiyey wardoonka si loo ogaado burcadda inta aysan badda gelin taasoo suurta gelisey in in badan la qabto inta aysan badda gelin.

## **Sidee wax looga qaban karaa Burcad Badeednimada**

Waxaa laga yaabaa haddii la adeegsado dhawr tallaabo oo wada socota in la heli karo natiijooyin waxtar leh, kuwaas waxaa ka mid ah:

a)In la xoojiyo Ciidammada amniga iyo Cadaaladda Maamullada ku wajahan meelaha ay Burcadbadeeddu saldhigga ku leeyihiin.

b)In la hawl geliyo madaxdhaqameedyada iyo culumaauddiinka degaannadaas iyadoo shirar iyo doodo wacyi gelin loo qabanayo.

c)In cafis loo fidiyo dhallinyarada doorata iney ka baxayaan burcadnimada.
d)In loo abaabulo Mashaariic shaqo abuur leh oo dhallinyadu ka shaqaysan karaan iyo kuwo kalluumaysi.
e)In mudnaan la siiyo bulshooyinka meelahaas ku nool si noloshooda kor loogu soo qaado,
f)Waxaa si sahlan loo xiri karaa saldhigyada Burcad Badeeddu ku leeyihiin Gobollada Dhexe sida Hobyo iyo Xarardheere haddii la adeegsado Maamullada Galmudug iyo Ximan iyo Xeeb taasoo aad u sahlan hadaba Maxaa loola jeedaa burcad badeedda waxaa lagu xirayaa xabsiyada Soomaaliland iyo Puntland, ma waxay ka dhigan tahay in aan amni ka soo socon muqdisho iyo koofurta dalka?.
Arrintaasi waxaa laga yaabaa in Soomaalida dhexdeeda ay ka abuurto colaado cusub waxyeellana u geysato wada noolashaha iyo is dhexmarka bulshada Soomaaliyeed.
Waxaa jira arrima badan oo Badda Soomaaliyeed la xiriira oo aan shirka london lagu soo qaadin, sida kalluumeysiga sharci darrada ah iwm.

**Badbaadinta Dhallinyarada :**

Burcad Badeednimada Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay ka timid markii ay shaqo wax soo saar leh iyo nabad dalkoodi ka waayeen, Baddoodi ay ka kalluumaysan jireenna Quwado ka xoog badani ka xoogeen,haddaba Bulshada caalamku ma waxay u arkeen in xalka keli ah oo wax looga qaban karaa uu yahay in la xirxiro oo xabsiyo laga buuxiyo?.
Bulshada Caalamka ma waan wax masuuliyad ah ka saarnayn in dhallinyaradaas la badbaadiyo oo xal ay uga maarmaan burcadnimada loo raadiyo?.
Burcadda keliya ma aha ee dhallinyara tira badan oo Soomaaliyeed ayaa markii ay waayeen mustaqbal iyo nolol ay isku hallayn karaan waxay doorteen iney isbiimeeyaan oo ama ay nolol dhaanta midda ay ku jiraan helaan ama ay dhintaan.

Dhallinyara badan baa ku jirta xabsiyada dalal badan oo caalamka ah ama ku dhimanaysa badaha si ay ugu tahriibaan Yurub, dalalka Carabta ama South Afrika.

***Shirka lagu Qabanayo Magaalada Istanbuul***

Shirka Qodobbada ka soo baxay waxaa looga hadlayaa dabagalkooda shir lagu qabanayo Istanbuul Bisha Juun oo ku soo aadeysa waqtiga dawladda oo aad gabaabsi u ah.

Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in shaqa badan la qabto inta aan la gaarin bisha Juun 2012 si loo hubiyo in la helo natiijo fiican.

**Xalka Arrinta Alshabaab oo sii Fogaaneysa**

Maraykanka oo ku adkaysanaya inaan wax wadahadal ah lala geli karin Alshabaab, wax ma yeeli doontaa dadaalkii ururro badani ugu jireen iney mar uun ku qanciyaan Alshabaab iney dadkooda wax la qaybsadaan?.

Waxaa laga yaabaa haddii aysan wax kale keenin ineysan suurtagal noqon Karin in urur ahaan hal mar heshiis loola galo,waxa keli ah oo furan in qof qof ama koox kooxdii doorata iney hubka iska dhigaan lala xaajoodo, haseyeeshee arrintaasi si buuxda uma soo afjari doonto waqti dhow*.*

**Wada hadalka Soomaaliya iyo Soomaaliland**

Soomaaliland iyo Soomaaliya iney wada hadlaan waa wax wanaagsan, hase yeeshee dawlad aan la soo dooran wax go'aan ah kama gaari karto masiirka dalka sidaas darteed maaddaama dawladda hadda soomaaliya ka talisa iyo midda imaan doonta 4ta sano ee soo socota aaney doorasho ku imaan doonin waxay arrintu u muuqataa in loo baahan yahay waqti dheer, haseyeeshee waxaa habboonaan lahaa in la helo qaab wax loo wada qabsan karo inta heshiis laga gaarayo.



**Dhismaha Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed,.**

Amniga ma ku fillaan doonaan Ciidanka Amisom, ma iyaga

ayaase dalka ciidan u ahaan doona muddada soo socota?.

Inkasta oo la soo kor dhiyo Ciidammada Amisom waxaa laga yaabaa ineysan si buuxda u soo celin Karin amniga dalka, laakiin waxaa suurtagal ah iney kaalin fiican ka qaadan karaan.

Inkasta oo dhismaha Ciidanka Soomaaliyeed lagu xusay war murtiyeedka haddana waxaa ahmiyad gaar ah leh in si degdeg ah loogu hawlgalo ciidan soomaaliyeed oo si wanaagsan loo abaabuley oo loo tababbaray.

Waxa ugu muhiimsan oo dalka nabadgelyadiisa soo celin kara waa in la helo ciidan Soomaaliyeed oo aad u tababbaran oo booliis iyo milatari ah.Si loogu guulaysto arrimaha amniga waxaa loo baahan yahay:

a)In ciidanka Booliska tababbar iyo qalab fiican la siiyo.

b)In ciidan Nabadsugid oo aad u tababbar la helo.

c)Ciidan Milateri oo tababbar gaar ah u leh sida wax looga qaban karo duruufaha gaarka ah ee hadda soomaaliya ka jira.

d)Arrinta ahmiyadda gaarka ah u leh in guul laga gaaro amniga waa arrinta ku saabsan mushaarka iyo dishibiliinka ciidammada.Haddii aan la helin ciidan wanaagsan oo shacbiga kalsoonidooda heli kara waxaa laga yaabaa inaan guul laga gaarin wax kasta oo la qabto.

Shacbigu mar kasta waxay arkaan khaladdaadka maamulka markaa jooga oo u taliya.

Haddii ciidanka dawladda uu ka faa'iidaysan waayo khaladaadkii Shabaabku ay sameeyeen hadda shacbigu ma eegayaan khaladaadkii Shabaabka laakiin waxay eegayaan khaladaadka Dawladda iyo Dhaqanka ciidammadeeda.Arrintaan oo dhan waxay ku xiran tahay sida loo qalabeeyo, loo tababbaro oo mushaar ku filan loogu helo ciidanka.Macquul ma aha mana suurtoobeyso in lagu shaqaysto askari aan mushaar la siin oo aan dishabiliin iyo akhlaaq wanaagsan lahayn.

## Gargaarka Aadaminnimo

Sii wadidda gargaarka samafaka waa muhiim laakiin waxaa jrey hadal hayn in dalka laga hirgeliyo barnaamijyo looga hortegayo waxyeellada abaaraha iyo masiibooyinka dabiiciga ah.Weli dadkii Muqdisho ku soo qaxay waqtigii abaaraha xeryo ayey ku jiraan;shaqooyin ay ku noolaadaan ma helin, meelihii ay ka soo barakaceenna laguma celin.

Waxay u baahan yihiin barnaamijyo horumarineed oo ay uga maarmaan ku tiirsanaanta taageerada Hay'adaha samafalka.

## Guddiga Midaysan ee Maaraynta Dhaqaalaha

Waa muhiin in la ilaaliyo dhaqaalaha qaranka waxaase loo baahan yahay in la helo nidaam dakhli iyo kharaj oo firfircoon oo waddanka ka shaqayn kara.Waxa laga yaabaa guudigani inuu qayb weyn ka qaato xagga ilaalinta hantida haseyeeshee waxaa suurtagal ah inuu caqabad ku noqdo xagga hawl fulinta,maaddaama ay mid yihiin dawlado iyo hay'ado caalami ah oo waaweyn oo laga yaabo in aan la heli Karin marka loo baahdo, sidaas darteed waa in lagu xoojiyo nidaam shaqayn kara.

## Sannadkii Khilaafka iyo  Sharci Darrada

Shirkii Kampala oo lagu dhexdhexaadiyey Madaxda TFG-da gaar ahaan Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka waxaa lagu heshiiyey in doorashooyinkii dib loo dhigo muddo Sannad ah si loo qabto hawlo muhiin ah si qaranka loogu gudbiyo marxad ka wanaagsan midda la joogo.Waxaa u baahan in dib loo eego waxqabadkii sannadkii loo kordhiyey madaxdaas waxa uga soo baxay ummadda Soomaaliyeed. Ma waxaa lagu tilmaamayaa sannad ummadda Soomaaliyeed guul iyo wax qabad u ahaa mise sannad guul darro oo culays kale u soo kordhiyey?!. Waxaa la hubaa in aan qiimayntiisa la isku waafaqsanayn oo qolo walba ay ka eegayaan xagasha ay isleeyihiin si fiicanbaad uga arki kartaan. Qolyaha aamminsan inuu ahaa sannad waxqabad waxay oran karaan wax badan

ayaa la qabtay oo ,waa sannad Muqdisho iyo Gobollo badan lagala wareegey Alshabaab,waxaa la sameeyey Road Mapka, waxaa la qabtay shirarkii Garoowe , Gaalkacyo iyo London, waxaa la qabtay shaqa badan oo ku saabsan diyaarinta Dastuurka ,ugu dambayn waxaan cagta saarnay waddadii aan ku gaari lahayn in dalku uu noqdo dawlad buuxda.

Hase yeeshee dhanka kale marka laga eego waxaa la oran karaa wuxuu ahaa sannad khilaaf badan iyo xadgudub dhanka sharciga uu waddanka oo dhan ku baahay.Waxaa la xusi karaa arrimaha soo socda:

**a-Casilaaddii xukuumaddii Farmaajo**

Arrintu waxay ku bilaabatay in shaqadii laga cayriyo xukuumaddii sababta u ahayd in la soo jeediyo in waqtiga la kordhiyo dadka Soomaaliyeedna ay rajo ka qabeen iney shaqo wanaagsan dalka ka qaban karto.Shaqooyinka xukuumaddaas lagu xusuusanayo waxaa ka mid ah markii ugu horreysey uguna dambeysey dalka ka hirgelisey Miisaaniyad, waxa kale oo lagu xasuusanayaa iney markii ugu horreysey Mushaar ay shaqaalaha iyo ciidanka siisay.

b-Sharaf dhaca ku yimid Dawladda Federaalka

Waxaa hoos loo dhigay Haybaddii iyo sharaftii dawladda federaalka ah iyadoo madaxdii dawladda federaalka ah ay la mid noqdeen madaxda gobollada iyo ururrada, dhammaantoodna ay noqdeen sixiixayaal siman. Qiima dhaca ku yimid dawladda federaalka waxaa ka mid ah in dastuurka faderaalka la waafajiyo kan gobollada arrintaas oo aan sharci ahaan iyo caqli ahaan aan midna sax ku ahayn.

**b-Samaynta Roadmapka iyo Shirarka**

Roadmapku waa barnaaj qaran oo loogu talagalay in lagu xalliyo arrimaha soomaaliya.Waxay ahayd in marka hore xukuumaddu soo diyaariso dabadeedna barlamaanku ansixiyo si uu sharci u noqdo.Haseyeeshee koox isku magacawday sixiixayaasha roadmaapka ayaa waxay si sharci darro ah ula

wareegtey awooddii sharci dejinta waddanka, iyagoo soo saaray go,aammo saamaynaya masiirka dalka. Wax kasta oo kooxdaas ay soo saarto wax saldhig sharci ah oo ay leedahay ma jirto.

**Ku Xadgudubka Axdiga ku Meelgaarka ah**

Sida dawlad lagu yaqaan wax kasta oo la qabanayo waxaa loo raacaa sharci haseyeeshee xukuumaddani wax sharci ah oo ay raacdo ma jirto cid ay hoos timaaddo oo la xisaabtantaana ma jirto, sidoo kalena ma jirto xudduud awooddeeda ay ku eg tahay. Xukuumadda hadda jirtaa waxay ka baxday sharcigii iyadoo si joogto ah ugu xadgudubta axdiga ku meelgaarka ah iyo shuruucda dalka.

**Soo Gelidda Ciidammada Deriska ah**

Dawladdu waxay si sharci darro ah iyadoo aan barlamaanka la tashan soo gelisey Ciidammada Dawladaha deriska ah iyadoo aan xataa loo samayn wax nidaam ah oo lagu koontoroolo ama lagula xisaabtamo.Dawladahaas oo si Madax bannaan hadda dalka uga hawlgala iyagoo aan wax wada shaqayn la ogyahay ka dhaxayn.

**Kala Jabka Baarlamaanka**

Barlamaanku waa Hay'adda saldhigga u ah shaqada Qaranka iyo Dawladnimada dalka, waa wakiilka dhabta ah ee shacbiga iyo marjica ugu dambeeya ee ay talada qaranku ka go'do. Xukuumaddu waxay wakiil ka tahay barlamaanka oo shacbiga wakiil ka ah, haseyeeshee iyadu masheegan karto inta barlamaanka dhinac marto Wakaaladda Shacbiga. Khilaafka Barlamaanku wuxuu ka yimid xukuumadda iyo qayb barlamaanka oo ka meermeeray in roadmapka barlamaanka la keeno, in la xallin waayana waxaa door weyn ku leh madaxda qaranka , ururrada gobolka iyo guud ahaan bulshada caalamka oo dhiirrigeliya inuu waddanku sharci darro ku jiro.Waxaa laga yaabaa iney xukuumaddu filayso haddii uu barlamaanku kala jabo oo uu shaqadiisa qaban

waayo iney taasi xaq u siineyso iney waxa ay doonto samayn karto ama sharci iyo sharci darraba ku shaqayn karto, taasoo aan marna xukuumadda ugu noqon Karin marmarsiinyo iney sharci darro wax ku maamusho.

**Heshiiska Kireynta iyo ilaalinta Badda**

Waa markii Saddexaad oo Badda Soomaaliya xubno xukuumadda ka mid ah ay heshiis aan u qalmin ummadda la gelayaan Shirkado iyo Dawlado shisheeye. Hadda wixii ka horreeyey waxaa Badda Soomaaliyeed badbaadiyey Barlamaanka oo mawqif adag ka qaatay in khayraadka dalka ummadda loo badbaadiyo. Heshiiska uu saxiixay Wasiirka Gaashaandhiggu waa mid xadgudub ku ah dalka oo aan u qalmin ummadda soomaaliyeed wax sharci ah oo loo cuskan karaana aaney jirin. Shacbiga waxaa laga rabaa maaddaama Barlamaankii daafici jirey la curyaamiyey iney khayraadka dalkooda ilaashadaan*.*

## Talooyinka

Haddii la doonayo in arrinta Soomaaliya si wanaagsan wax loogu qabto waxay u baahan tahay:

1) In marka hore mushkiladda la derso oo la xaddido, markaana la eego xalalka kala duwan oo suurtagalka ah. Waxaa habboon inta aan lagu dhaqaaqin qabashada shirarka in laysugu yeero dad khubaro iyo waaya arag ah oo lagala tashado sida arrinta loo waajahayo iyadoo la tixgelinayo dareenka iyo rabitaanka kooxaha kala duwan oo arrintu khusayso.

2.In Dadka Soomaaliyeed la dhegeysto oo dareenkooda la tixgeliyo, taladana la ballaariyo oo laga qaybgeliyo qaybaha kala duwan ee bulshada, lagana daayo arrinta in dad gaar ah wax laga weydiiyo..

3.In ururrada iyo dawladaha daneeya arrimaha Soomaaliya ay ku ekaadaan iney Soomaalida  gacan ku siiyaan sidii ay u heshiin lahaayeen oo iyagoo isku duuban wax u qabsan lahaayeen.

4.In Soomaalidu u muujiyaan deriskooda ineysan khatar ku ahayn diyaarna u yihiin wada noolaasho ,wax wadaqabsi iyo iskaashi.

5.In hawlaha roadmapka lagu sheegey  si fiican oo waqtiyaysan loo faahfaahiyo si wanaagsanna oo daacadi ku dheehan tahayna looga mira dhaliyo, lana saxo khaladaadka ku jira roadmapka iyo hawlaha sida loo qorsheeyey. Waxaa loo baahan yahay in waxa la qabanayo la waafajiyo axdiga qaranka ku meelgaarka ah oo ah sharciga asaasiga ah ee dalka hadda ka jira waana inaan la fududaysan in la garab maro, maxaa yeelay haddii aan sharciga hadda lagu shaqeeyo la ilaalin kan la samaynayana lama dhawri doono.

6.In Arrimaha samaynta dastuurka iyo federaalka laga daayo dedejinta iyo u adeegsiga dana gaar ahaaneed oo si fiican looga doodo loogana gorgortamo, loona raaco qaabka axdiga ku meelgaarka loogu qeexay, haddii laga fursan waayana si sharciga waafaqsan wax looga beddelo.

7.In barlamaanka la yareeyo tiradiisa tayadiisana la hagaajiyo sidoo kalana xukuumadda iyo hoggaanka.Waa in xoogga la saaro sidii dalka loogu dhisi lahaa xukuumad, barlamaan iyo hoggaan karti iyo hufnaan leh dadkuna la xisaabtami karo oo iyagu iska leeyihiin.

8.In la xoojiyo Hayadaha sharciga iyo ilaalinta hantida Qaranka lana siiyo madaxbannaani sharci iyo xorriyad  ay ku gudan karaan hawlahooda,loona abuuro santuuq dhaqaale oo madax bannaan oo ka ilaalin kara in lagu shaqaysto ama loo

xagajugleeyo.Hay'adaas waa in shaqadooda iyo kartidooda iyo hufnaantooda aad loola socdo khaladaadkoodana si degdeg ah loo qabto.Waa in maanka lagu hayo in cilladda ugu weyn ee dalka ka jirtaa ay tahay ku tumashada sharciga iyo inaan waxba laysu raacan.

*9.Sida aan kor ku soo sheegnay mushkiladda ugu weyn oo dalka haysata waxaa saldhig u ah oo uguna muhimsan dawladnimo xumada, musuqmaasuqa iyo xukuumadda oo aan qaban shaqadii loo xilsaaray ama shacbiga soomaaliyeed ay ka sugayeen. Waa xukuumadda midda laga doonayo amniga, maamul wanaagga, dhismaha ciidanka iyo dhismaha hayadaha dawladda iyo jahaynta arrimaha siyaasadda. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in isbeddel weyn lagu sameeyo qaabka ay u shaqayso iyo qaabka ay u dhaqanto xukuumaddu.*

*Haddii ay tahay ujeeddada Road Mapka loo sameeyey in la xalliyo mashaakilka dalkan haysta, si loogu dhiso nidaam dawladeed oo shaqayn kara. Waxaa habboon in roadmapku mudnaanta koowaad siiyo in dalku helo dawlad wanaag iyo isbeddel lagu sameeyo habdhaqanka soo jireenka ah ee dawladda soomaaliya iyadoo la ilaalinayo ku dhaqanka sharciga qof walbana lagula xisaabtamayo laguna ixtiraamayo masuuliyadda loo dhiibey.*

*10.In Dalka laga sameeyo hawlgal weyn oo amniga lagu soo celiyo kaas oo ay iska kaashadaan dhammaan dalalka iyo ururrada daneeya soomaaliya,kaas oo lagu soo gabagabeeyo muddo gaaban isla markaana ay hoggaamiso dawlad xoog leh.Waxaa wanaagsan in hawlgalkaas lagu soo gabagabeeyo doorasho in dalka laga qabto oo dawlad isku filan loo dhiso,sidii Ciraaq iyo Afganistaan laga sameeyey.*

*11.In xoogga la saaro dhismaha ciidammada nabadgelyada loona sameeyo sharciyo u gaar ah,lana siiyo tababbar iyo qalab casri ah oo ay shaqadooda si fiican ugu gudan karaan.Sidoo kale waa in la helo ciidammo milateri ah oo u tababbaran wax ka qabashada duruufaha gaarka ah ee dalka ka jira.*

*12.Waa in barnaamij horumarin iyo dibudhis xoog leh dalka laga sameeyo si dhallinyarada looga saaro burcadbadeednimada,tahriibka iyo argagixisannimada loona helo mashaariic shaqa abuur leh oo dhallinyara badan jahayn karta,dhab ahaanna waa arrin mudnaan weyn leh waana in loo arko iney amniga ay qayb ka tahay mudanna in si degdeg ah loo bilaabo.*

*13.Dhismaha iyo Hagaajinta Maamulka*

*Dalka waxaa ka burburay maamulkii,waxaa meesha ka baxay shaqaalihii khibradda lahaa oo ka shaqayn jirey xafiisyada dawladda, sidoo kalena waxaan jirin shuruucdii iyo habraacyadii ay ku shaqayn jireen hay'adaha dawladdu. Shaqaalaha hadda dawladda u shaqeeyaa ama waa dad cusub oo hadda jaamacado ka soo baxay oo aan khibrad shaqo lahayn amase waa kuwo aan khibrad iyo aqoon midna lahayn oo weligood aan maamul soo arag. Sidaas darteed waxaa wanaagsan in xoogga la saaro sidii loo hagaajin lahaa maamulka hay'adaha dawladda xataa haddii ay khasabto in la keeno khubaro ajnabi ah oo wax toosin karta. Waxaa kale oo la raadin karaa wixii ka haray shaqaalihii maamulka yiqiin oo hore hay'adaha ugu shaqayn jirey, waana in dib loo dhiso shuruucdii iyo habraacyadii lagu shaqayn jirey oo hadda maqan.Maaddaama aan maamulkii hay'aduhu dhisnayn waxaa la samayn karaa in wasiirka iyo agaasimaha guud ee wasaarad kasta lagu xiro inuu khibrad u leeyahay wasaaradda uu masuulka ka noqonayo. Waxa kale oo suurtagal ah in la abuuro wasaaradda horumarinta maamulka.*

## Gunaanadka

Qoraalka aan halkan ku soo bandhigey waa Qoraal aan ku eegayo dadaalka loogu jiro dibusoocelinta Qaranka Soomaaliyeed iyo caqabadaha hortaagan in arrintaas lagu guuleysto. Waxaan xusuusan karnaa in la qabtay shirar iyo dadaallo badan oo lagu doonayey in dalka lagu xasiliyo oo loogu dhiso dawlad.

Waxaa la soo alifey nidaam 4.5 la yiraahdo oo Soomaalidu wax ku qaysato hase yeeeshee aan in badan oo shacbiga ka mid ahi ku qanacsanayn.

Muddo badan waxaa bulshada caalamka loo daba fadhiyey xal u helidda arrimaha dalka waxayse noqotay wadda dheer oo aan dhammaad lahayn, waxaan iyana dhammaad lahayn ismuquuninta, isjiidjiidka iyo is aamindarrada u dhaxaysa beelaha iyo qabaa'ilka Soomaalida taas oo maalinba tan ka dambaysa sii kala firdhinaysa xooggii iyo wadajirkii ummadda.Hadda waxaa socda dadaal lagu doonayo in dalka arrimiisa lagu xalliyo waxaan doonayaa in aan akhristayaasha iyo qof kasta oo danaynaya arrimaha soomaliya ka codsado inuu aragtidiisa ka muujiyo haddii waddada lahayo si lagu soo celiyo qaran soomaaliyeed ay tahay mid sax ah iyo haddii kale. Xusuuso Dardaarankii ugu dambeeyey ee Col.Cabdullaahi Yuusuf oo uu ku yiri “waxaan ciidammada shisheeye dalka u keenay iney dalka nala xasiliyaan dabadeedna innaga baxaan marka aan amnigeenna hananno hase yeeshee waxaan isku casiley markii ay ii sinnaatay in aan dabadhilif noqdo iyo in aan shaqada ka tago, war Soomaaliyeey ma jirto cid wax idiin qabanaysee adinku isku soo carara oo iskaashada”. Hadaba qof kastaa waa uu ku darsan karaa wixii fikrado ah oo uu is leeyahay waxtarbay ummada Soomaaliyeed u yeelan karaan.Akhristayaasha waxaa u furan wixii dhallilo iyo toosin ah oo ay qoraalkan ka sheegayaan.

Dhinaca Kale Buuga aan ugu Magacdarey Wadadii Ma Haynaa Mise waan ka Habowney oo ka hadlaya Geedi Socodka Nabada Soomaaliya ayaa  Qoraaga Buugaan Dr Daahir Xasan Guutaale waxaa uu  halkaan uga Mahadcelinayaa intii igu Gacansiisey  Qorida Buugaan oo aad kaga Bogan doontid  Habka loo marayo  Nabada , Dib u Heshiisiinta iyo Dowlad Wanaaga iyo arrimo kale oo fududeyn kara arrimaha aan kor ku soo sheegney sidoo kale waxaa uu qoraaga uu xusayaa Google News  oo u fududeyey Sawirada Buugga ku jira  kaasoo aan la'aantiis aanan heli lahayn

**Qore  Dr Daahir Xasan Guutaale**
**E-Mail  dahir.x@gmail.com**
**Tel 00252615971919**
**Tel 00252699916500**

---

***© Xuquuqda Qoraalkani Xafidan | Afeef: Aragtida qormadan waxaa leh*** **Dr Daahir Xasan Guutaale**

**FAAFIN: SOMALITALK.COM | May 2012**